

Hiigsiga Waxbarashada Shucuurta Bulshada



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

Jadwalka Mawduucyada

Toc84437910Jadwalka Mawduucyada **2**

Xog aasaasiga ah **3**

Maxay tahay sababta aan u aburnay Dukumiintigaan 3

Maxay tahay sababta waxbarashada shucuurta (SEL) muhiimka u tahay 4

Mabaadii'da Hagidda ee Dukumiintigaan 6

Tilmaamaha La isticmaalo **13**

Tixraaca Qaabka Shaqada 13

Sida la isku duway dukumiintigaan 14

Yaa isticmaali kara Dukumiintigaan 16

Heerka 1 aad: Is Baraarujinta **19**

Qaababka loo Caawiyo 20

Milicsiga iyo Nidaamka 20

Heerka 1 aad: Tilmaamaha Isbaraarujinta **21**

Heerka 2 aad: Is Maareynta **35**

Qaababka loo Caawiyo 36

Milicsiga iyo Hannaanka 36

Heerka 2 aad: Tilmaamaha Is Maareynta **37**

HEERARKA 3: Is-aaminaada **49**

Qaababka loo Caawiyo 50

Milicsiga iyo Hannaanka 50

HEERARKA 3: Tilmaamaha Is-aaminaada **51**

Heerka 4 aad: Wacyigelinta Bulshada **72**

Qaababka loo Caawiyo 73

Milicsiga iyo Hannaanka 73

Heerka 4 aad: Tilmaamaha Wacyigelinta Bulshada **74**

Heerka 5 aad: Maamulka Bulshada **90**

Qaababka loo Caawiyo 91

Milicsiga iyo Hannaanka 91

Heerka 5 aad: Tilmaamaha Maamulka Bulshada **92**

Heerka 6 aad: Ka qaybgalka Bulshada **108**

Qaababka loo Caawiyo 109

Milicsiga iyo Hannaanka 109

Heerka 6 aad: Tilmaamaha Ka qaybgalka Bulshada **110**

Xog Dheeraad ah A: 10 Ka Astaamood ee ugu sarreeya

Dugsiga Sare ee SEL **125**

Xog Dheeraad ah B: Milicsiga SEL ee Gaarka ah **127**

Xog Dheeraad ah C: Isku Qiimeynta Fasalka ee Taageerada

SEL **132**

Erayada Luuqada **137**

Ogeysiiska Sharciga **140**



Xog aasaasiga ah

Maxay tahay sababta aan u aburnay Dukumiintigaan

Hindise Sharciyeedka Labaad ee Badelka 5082, oo la ansixiyay 2019, ayaa ku baaqay in la sameeyo gudi SEL oo gobolka oo dhan ah si loo aburo jaangooyinka K-12 SEL. Habkaan jaangooyinka ah waxaa loola jeeday in:

- Lagu aqoonsado Dhaqamada ugu fiican iyo/ama tilmaamaha dugsiyada dadwaynaha
- Lagu aqoonsado fursadaha xirfadaha hormarka
- Lagu aqoonsado istaraatiijiyadaha isku xirka u dhaxeeya iyo kuwa guud, gaar ahaan inta lagu jiro kala guurka muhiimka ah

Sharcigu waxa uu sidoo kale ku baaqay in la sameeyo dukumiintiga xogta, oo ay ku jiraan heerarka OSPI SEL iyo Tilmaamaha Waxbarashada Dhallaanka iyo Hormarinta ee Gobolka Washington (ELDGs). ELDGs waxay sharaxaan dabeecadaha iyo xirfadaha carruurta laga bilaabo marka ay dhashaan ilaa fasalka 3 aad waxaana lagu talinayaa inay noqdaan aalad bixiyayaasha xanaanada ilmaha, macallimiinta iyo qoysaska si ay u fahmaan una taageeraan waxbarashada gaar ahaan hab hormar ku habboon.

Heerarka SEL iyo halbeegyada ay weheliyaan mabaadii'da hagitaanku waxay bixiyaan aasaaska iyo nidaamka hirgelinta SEL ee wixtarka leh. Qaab dhismeedkaan waxa uu sharaxayaa xirfadaha SEL ee muhiimka ah wuxuuna qeexayaa SEL inay tahay geeddi socod ay shaqsiyadu ku dhisaan wacyiga iyo xirfadaha maareynta shucuurta, dejinta yoolalka, sameynta xiriiri, iyo sameynta go'aano mas'uuliyadeed oo taageera guusha dugsiya iyo nololaha. Heerarka SEL ee gobolka Washington iyo halbeegyada waxaa soo saaray koox ka kooban dhakhaatiir iyo khubaro kale oo la shaqeeya dhallinyarada iyo qoysaska ku sugan goobaha waxbarashada, iyo aqoonta mawduucyada la xiriira SEL. Hormarinta qaab dhismeedka SEL waxa uu ka tarjumayaa talooyin, fikrado iyo aragtiyo laga helay daneeyayaasha gobolka oo dhan oo laga soo uruuriyey kooxaha diiradda la saaray, golyayaasha bulshada, iyo xog aruurinada internetka.

Oggolaanshaha Istaraatiijiyada Waxbarida, LLC, waxaan sidoo kale ku darnay qaybo kamid ah Ujeedooyinka *GOLD® ee la xariira Hormarinta & Waxbarashada, Dhalashada ilaa Fasalka Saddexaad* ee isgoyskaan si loo siiyo qoysaska iyo daryeelka carruurta/adeeg bixiyayaasha xanaanada illaa da'da fasalka saddexaad. Qiimayntaan waa agab waxaana caadi ahaan loo adeegsadaa barnaamijyada waxbarashada dhallaanka waana saldhigga qiimeynta WaKIDS ee laga isticmaalo dugsiyada dadwaynaha ee Washington. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qiimeynta agabkaan, waxaad booqan kartaa webseedka [GOLD® website](#). Waxaad xog badan oo ku saabsan WaKIDS ka badan kartaa adoo [booqanaaya webseedka OSPI](#).

Maxay tahay sababta waxbarashada shucuurta (SEL) muhiimka u tahay

Baaritaan ay dhowaan sameeyeen macallimiinta xanaanada ee Maraykanka¹, qaar badan oo kamid ah waxay sheegeen in ardaydoodu aanay diyaar u ahayn xanaanada markay yimaadeen. Si xad dhaaf ah, macallimiintaan waxay mudnaanta siiyeen waxbarashada shucuurta bulshada ee ka sarraysa tacliinta marka la eego waxa carruurto u baahan yihiin in loo tixgeliyo inay diyaar u yihiin dugsiga. Xaqiiqdii, xirfadaha hoos yimaada Waxbarashada shucuurta ee Bulshadu waxay ka kooban yihiin xirfadaha carruurto u baahan yihiin si ay u noqdaan arday muddo dheer wax barta, xubin wanaagsan oo bulshada kamid ah, iyo maalin uun, qof wayn oo guulaysta oo iskaashi sameyn kara, xallina kara mushkiladda oo ka shaqayn kara khilaafka asxaabta iyo asxaabta adduunka. Xirfadaha shucuurta bulshada waxaa, la dhihi karaa, waa xirfadaha ugu muhiimsan ee ilmuhu waligiis u baahan doono.

Mid kamid ah [daraasadaha](#), Ururka Qaranka ee Kuleejyada iyo Shirkadaha (NACE) waxay maamulayaasha shaqaaleysiinta waydiiyeen inay magacaabaan tobanka xirfadood ee ugu muhiimsan ee ay ka eegeen shaqaalaha marka ay shaqaaleysiinayaan. Xirfadaha waxaa kamid ah awooda ku shaqeynta koox ahaan, go'aaminta iyo xallinta dhibaatooyinka, qorsheynta iyo abaabulka, la xiriirka saaxiibada iyo macaamiisha iyo helidda iyo habeynta macluumaadka. Xirfadahaan dhammaantood waxay hoos yimadaan qaybta SEL, illaa dhowaan, waa la iska indha tiray. Nasiib wanaag, dugsiyadu waxay bilaabaya inay mudnaanta koowaad siiyaan, taasoo u horseedaysa inay caruurto helaan natiijooyin wanaagsan iyo sidoo kale dadka waawayn ee la shaqeeya.

Waxaa intaas dheer, waxbarashada shucuurta bulshada waxay ka kooban tahay waxyaabo badan oo loo yaqaan "Xirfadaha Qarniga 21aad", gaar ahaan Xirfadaha waxbarashada ee loo yaqaan "4 C's". Xirfadahaan waxay kor u qaadaan kartida ardaygaiyo awooda waxbarashada waxaana ka mid ah:

- Fikirka wanaagsan
- Hal abuurka
- Iskaashiga
- Isgaarsiinta

Xirfadahaan Qarniga 21aad waxaa la siiyaa mudnaan koowaad si loo hubiyo in ardayda maantaay awoodaan inay la jaanqaadaan sida adduunku isku badalaayo oo loo siiyo qalabkii ay u baahnaayeen si qaab dhab ah loogu diyaariyo dugsiga iyo nolasha ka dambeysa. Waxaad xog badan oo ku saabsan Xirfadaha Qarniga 21aad ka heli kartaa barta ascd.org

Si aan carruurta ugu taageerno sida ugu wanaagsan ee ay u kobcinayaan xirfadahaan, waa inaan marka hore qeexnaa waxa waxbarashada dareenka shucuureed ay tahay. Ururka loo yaqaan Collaborative for Academic, Waxbarashada Shucuurta Bulshada (CASEL) ayaa qeexaya SEL:

¹ Curby, T. W., iyo Berke, E. (2016, Abriil). Fikradaha macalinka dugsiga barbaarinta ee diyaargarowga xanaanada: Muhiimada xirfadaha shucuurta bulshada. Warqad lagu soo bandhigay Cilmi baarista Waxbarashada Mareykanka ee roundtable, Washington, DC.



Waxbarashada shucuurta bulshada (SEL) waa qayb kamid ah waxbarashada iyo hormarka aadanaha. SEL waa habka ay dhammaan dhalinyarada iyo dadka waawayn u helaan oo ay adeegsadaan aqoonta, xirfadaha, iyo dabeecadaha si loo hormariyo aqoonsiyada caafimaadka leh, loona maareeyo shucuurta oo loo gaaro himilooyin shaqsiyeed iyo mid guud, la dareemo oo loo muujiyo u damqashada dadka kale, loo sameeyo loona ilaaliyo xiriirrada taageera, iyo go'aamo mas'uul ah oo daryeel leh.

SEL waxay kor u qaadaa sinnaanta waxbarashada iyo heerarka sare ayadoo loo maraayo iskaashi dhab ah oo iskuul-qoys-bulsho si loo dhiso jawi waxbarasho iyo waaya aragnimo ay ka muuqdaan is aaminaad iyo xiriir ku dhisan wada shaqayn, manhaj iyo tilmaamo adag oo macno leh, iyo qiimeyn joogto ah. SEL waxay gacan ka geysan kartaa wax ka qabashada noocyada kala duwan ee sinaan la'aanta waxayna awood u siin kartaa dhalinyarada iyo dadka waawayn inay si wada jir ah u abuuraan dugsiyo sameynaaya kobac ayna gacan ka geystaan nabadgelyada, caafimaadka, iyo bulshooyin cadaalad ah.²

Xirfadlayaasha Waxbarashada Dhallaanka waxay ogyihiin in marka carruurta laga taageero koritaankooda shucuurta ee bulshada iyo waxbarashada laga bilaabo da'da hore, waxay u badan tahay inay::³

- Ku guulaystaan tacliintooda
- Muujiyaan naxariis, xiiso iyo faham dadka kale ay u qabaan
- Yeeshaan awood korarta oo ay ku maareeyaan walaaca iyo niyad jabka
- Sameen xirfado fikir oo xoog leh
- Xaliyaan dhibaataada una xaliyaan si hufan oo hal abuur leh
- Muujiyaan dabeecad wanaagsan oo ku saabsan naftooda, kuwa kale iyo dugsiyadooda
- Meesha ka saaraan wareegyada jilka ee sababa saboolnimada, xadgudubyada iyo isticmaalka maandooriyaha
- Sameeyaan lacag badan inta ay nool yihiin
- Helaan natiijooyin caafimaad oo ka fiican kuwa aan lahayn xirfadaha dareenka bulshada ee xooggan

Natiijooyinkaan ma aha faa'iidooyinka kaliya ee mudnaanta koowaad lagu siinaayo waxbarashada shucuurta bulshada, hase yeeshee. Cilmi baarisyada qaar kamid waxay kale oo ay muujiyeen in marka dadka waawayn ay mudnaanta siiyaan xirfadahaan, ayaguna ay laftoodu way ka faa'iideystaan. Dadka waawayn ah ee si ulakac ah u taageera hormarinta xirfadaha SEL ee loogu talagalay carruurta waxay muujiyaan adkaysi wayn, si fiican ayay u maareeyaan walbahaarka waxayna u nugul yihiin waxyeelooyinka marka loo eego kuwa aan samayn.

² CASEL casel.org/what-is-sel

³ CASEL casel.org/impact



Mabaadi'da Hagidda ee Dukumiintigaan

Qaab dhismeedka SEL waxa uu ka kooban yahay heerarka SEL, halbeegyada, tilmaamayaasha, iyo hagista wuxuuna qeexayaa hab la wadaago, gobolka oo dhan ah si loo hirgeliyo SEL oo ah heer degmo iyo heer dugsi. [Qaab dhismeedka OSPI SEL](#) ee soosocdaa waxa u bixiyaa aragti la wadaago ayadoo loo maraayo afar mabaadi'da hagta wuxuuna dejiyaa saddex qodob oo muhiim u ah hirgelinta SEL ee guulaysta.

1. **Sinnaanta**—Ilmo kasta waxa uu helaa wuxuu u baahan yahay si uu u hormariyo awoodiisa waxbarasho iyo tan bulsho ee buuxda.
2. **Dhaqamada wax ku oolka ah**—Waxay ardaydu ka dhaxlaan' karti iyo waayo aragnimo gaar ah iyo jihataynta waxbarashada la xariirta daruufaha dhaqanka shaqsiyaadka.
3. **Naqshada Caalamiga ah**—Waxay bixisaa qaab dhismeed lagu hagaajinaayo laguna wanaajinaayo waxbaridda iyo waxbarashada ee ku aadan dhammaan dadka ayadoo laga saaraayo caqabadaha ku jira manhajka.
4. **Dhaqamada Waxyeelooyinka-Lala socdo**—Waxa uu aqoonsadaa awoodaha gaarka ah iyo caqabadaha carruurta iyo dhalinyarada marka loo eego dhibaatooyinka ay la kulmaan.

Qaab dhismeedka [Tusaha Hirgelinta OSPI SEL](#) waxa uu leeyahay saddexdaan qodob ee muhiimka ah ee soo socda:

1. **Abuurista shuruudo aad ku taageerayso ardayda SEL** ayadoo abuuraya jawi dugsi iyo mid dhaqan togan leh, isku xiraaya siyaasadaha SEL iyo dhaqamada dugsiya kajira, diiradana saaraya hababka ku salaysan fasalka ee kor u qaada SEL, xulashada iyo hirgelinta hababka SEL ee ku salaysan caddaynta, adoo adeegsanaya xogta hormarka ee joogto ah.
2. **La shaqeynta** qoysaska, bulshooyinka, iyo fidiyaasha fursadaha waxbarashada ee naqshadeynta, hirgelinta, iyo dib u eegista qorshayaasha maxalliga ah si loogu daro SEL dugsiyada iyo bulshooyinka.
3. **Dhisidda kartida dadka waawayn** micnaheedu waa dhisidda kartida SEL ee dadka waawayn oo la muujin karo oo lagu daydo. Abuuritaanka kooxda hogaanka SEL, sameynta bayaanada aragtida, sameynta baahiyo iyo qiimeyn diyaarsanaanta, iyo sameynta qorshe fulin waxay xaqiijin doontaa in waxbarashada xirfada la bartilmaameedsado waxayna taageeri doontaa in la buuxiyo baahiyaha dhammaan ardayda.

SINNAANTA

1. Waa inaan abuurnaa shuruudo lagu taageeraayo ardayda SEL.

Si aan ugu adeegsano wax kasta oo aan ku qabano dugsiyadeena iyo barnaamijyadeena daryeelka carruurta, waa inaan xusuusnaano in dhaqankeenu uu na siinaayo muraayad gaar ah oo aan dunida ku aragno. Tixgelinta joogtada ah ee ["Moodhelka Iceberg"](#) ee la xariira dhaqanka, caqiidooyinka shucuurta bulsho waxay u muuqataa inay ka hooseeyso meesha loogu talagalay. Waxaa muhiim u ah macalimiinta iyo maamulayaashu niyada ku hayaan arrintaan ayagoo fulinaya nooc kasta oo manhajka waxbarashada shucuurta bulshada ah oo fasalkooda lagu dhigto, barnaamijkooda ama degmadooda. Waxaa intaas dheer, waxaa inaan iska ilaalinaa nidaamyada sida "indho la'aanta midabka" ama aan dadka oo dhan "isku si ula dhaqnaa oo aan diirada saarnaa waxyaabaha ay wadaagaan" ee inta badan kor loo qaado oo dhab ahaantii



dhaawici kara xiriirkeena. Ayadoo la tirtiraayo qayb uun kamid ah aqoonsiga qofka', waxaan ku dhiirigelinaynaa inay ku milmaan ama ku dhex milmaan dhaqan—dhaqameedka ugu badan ee loo yaqaan habka Luuqad isku dhafka.

Dadwaawayn ka ahaan, waxaa nagu waajib ah inaan kobcino dareenka lahaanshaha iyo bulshada ee carruurta aan daryeelno. Marka ilmuhu dareemo in la aqbalay, la jecel yahay oo loo qadariyay cida ay yihiin, meesha ay ka yimaadeen, iyo cidda ay noqonayaan, waxay u badan tahay inay sameeyaan kobac iyo isbaddel wanaagsan. Waxaan kobcin karnaa dareenka lahaanshaha iyo badbaadada anagoo u dabbaaldegeyana waxa qof kasta kadhiga qof gaar ah. Markaan kobcino xiriir adag, kalsooni iyo raaxo leh, carruurta yaryarka ah waxay noqon doonaan kuwo raaxo u sameeyo inay halis galaan, waxayna isku dayaan waxyaalo cusub oo aan ku kalsoonahay inaan halkaas u joogno si aan u hagno una taageerno.

Waxaa kale oo naga saaran mas'uuliyad ah inaan hubino in taageerooyinka aan bixino ay yihiin kuwo siman oo dabooli kara baahiyaha ilmo kasta gaar ahaan, halkii aan ka qaadan lahayn in ilmo kasta ku kori doono isla xaaladahaas. Waa shaqadeena inaan abuurno goobo ammaan ah oo ku dhex jira oo kor u qaada ka falcelinta dhaqanka iyo tayada—dhaqanka fikradda ah inaan dhamaanteen u furanahay waxbarashada dadka kale iyo waaya aragnimadooda si carruurta ugu koraan dareen xoogan oo la xariira naftooda iyo dhaqankooda iyo ayna u dhisaan xiriiri waara, oo togan oo caafimaad qaba.

Waxbarashada shucuurta bulshada waxay ku guulaysan kartaa oo kaliya jawiga waxbarashada oo leh badbaado ay dareemayaan dhammaan ka qaybgalayaasha. Marka carruurta ogaadaan inaan loo soo dhoweyn sida ay yihiin oo kaliya, laakiin ay oggaadaan in loo dabaaldego dhammaan waxyaalaha gaarka ah ee sida ay yihiin ka dhiga, waxay aad ugu janjeeraan inay noqdaan kuwo furfuran oo daacad ah, sahamiya fekerkooda iyo dareenkooda, iyo inay gacan ka geystaan kobcinta bulshada taageerta waxayna kor u qaadaan fayooabaanta dareenka bulshada.

2. *Waa inaan hawshaan u qabanaa si wada jir ah.*

Iskaashi lala yeesho qoysaska iyo daryeel bixiyayaasha kale, iyo si lamid ah udub dhexaadka codka ilmaha', waxay gacan ka geysan doontaa in la hubiyo in baahida ilmahaloo daboolo sida ugu wanaagsan ee aan awoodno. Marka lagu daro dhammaan bahda waxbarashada, la -hawlgalayaasha bulshada, qoysaska iyo ardayda waa muhiim si loo hubiyo in dhammaan codadka la maqlo. Markaan sameeyno iskaashi bulsho oo ku aadan waxbarashada, waan u xoog badnaan doonnaa.

3. *Waa inaan dhisnaa kartida dadka waaweyn.*

Ka warhaynta kala duwanaanshaha iyo fahamka nooca saameynta cunsuriyadda taariikheed iyo mida caddaalada daradu ku yeelatay bulshadeena waa muhiim. Waa inaan qiranaa eexdeena qarsoon ee gaarka ah iyo sida ay u saameeyaan is dhexgalka iyo xiriirka aan la leenahay dadka naga duwan. Qayb muhiim ah oo kamid ah waxbarashada shucuurta bulshada ayaa tixgelinaysa dhinac kasta oo laga yaabo inaan qabano, iyo inaan si firfircoon uga shaqeyno sidii loola dagaalami lahaa.

Ilmo kasta waxa uu noola yimaadaa waayo aragnimo nololeed oo kaladuwan, xoog iyo baahiba. Anaga ayay nagu xiran tahay inaan hubino in dhaqankeenu uu tixgeliyo kuwaan, xitaa marka laga yaabo inaysan la jaanqaadi karin filashooyinka dhaqan ee lagu qabtay barnaamijka, dugsiga ama degmada. Dhisidda kartida dadka waawayn ee la xariira hababka sinaanta waxaa kamid ah wada hadalka, milicsiga, tababarka ka hortagga eexda iyo waxbarashada iyo hormarka oo sii socda. Marka aanu dabacsanaano, ka jawaabno oo ka fikirno ficilkeenna, dhab ahaan isbadel ayaan u samayn karnaa dhammaan carruurta.



DHAQAMADA WAX KU OOLKA AH

1. *Waa inaan abuurnaa shuruudo lagu taageeraayo ardayda SEL.*

Markaan sameyno xariir wanaagsan, kalsooni iyo xiriir dhab ah aana la yeelano carruurta, waxaan u tusaalaynaynaa tusaynaana sida loo abuurto loona kobciyo cilaqaadyadaan. Markaan dareemo ammaan iyo taageero, waxay u badan tahay inaan u furnaano waxbarashada iyo koritaanka. Qayb ka mid ah dhisidda kalsoonida, cilaqaadyada dhabta ah waxaa kamid ah u oggolaanshaha carruurta inay ahaadaan gabi ahaanba ayna aqbalnaann--u dabbaaldega dhaqankooda gaarka ah iyo baahiyaha, danaha iyo waayo-aragnimada taas la socota, iyo sidoo kale u oggolaanshaha inay sahamiyaan oo dhisaan aqoonsigooda.

Taa badelkeeda, marka carruurta dareemaan in qaybo kamid ah aqoonsigooda la doonaayo in la qariyo, waxaan si dhakhso leh oo aad u fudud u dhisi karnaa kalsoonidarro waxaana bari karnaa ilmahaas in cidda ay yihiin ay khalidan tahay ama ay tahay inay ka xishoodaan aqoonsigooda ama dhaqankooda. Anagoo dhiseyna jawi nabdoon jir ahaan iyo dareen ahaanba u nabdoon, waxaan ka caawin karnaa dhammaan carruurta inay bartaan qofka ay yihiin shaqsi ahaan iyo bulsho ahaan, oo aan u tusaalyno sida loo soo dhoweeyo loona soo dhaweeyo kuwa kale oo kaduwan oo gaar ahaaneed sidoo kale.

2. *Waa inaan hawshaan u qabanaa si wada jir ah.*

Markaan isku dayno inaan dhisno barnaamij dhaqan ahaan ku habboon, waa inaan dhisnaa ayadoo lala kaashanayo qoysaska iyo bulshada ka kooban barnaamijkeenna. Waxaan sidaas ku samayn karnaa anaga oo hubinayna in dadaalladeennu ay yihiin kuwo loo dhan yahay, oo lagu casuumo qoysaska iyo daneeyayaasha kale ee bulshada si ay uga qayb qaataan go'aan qaadashada iyo xalinta dhibaatooyinka. Kuma filna in si fudud loo shaqaaleeyo shaqaale kaladuwan ama loo adeego qoysas kaladuwan haddii codadkaasi aysan xuddun iyo sare u qaadin inta lagu jiro wada sheekaysiga ku saabsan sinnaanta iyo ka jawaabidda dhaqanka. Waa inaan si dhab ah u dhageysanaa si aan u fahamno una aqbalno inay yihiin khubarada baahiyahooda iyo kuwa carruurtooda.

3. *Waa inaan dhisnaa kartida dadka waaweyn.*

Qofna kuma dhalan dhaqan wax ku ool ah ama karti. Waa safar muddo dheer ah oo aan lahayn meel loo socdo; waxaan had iyo jeer ku samayn karnaa waxbarashada iyo koboca aaggaan. Macalimiin ka ahaan, maamuleyaal ahaan, bixiyeyaasha xanaanada carruurta iyo xubnaha qoyska, waxaan saamayn wayn ku leenahay sida carruurta u maraan kala duwanaanshaha dhaqanka iyo sida carruurta u arkaan uguna dabaaldegaan dhaqankooda. Waxaan hubin karnaa inaan sameynayno intii karaankeenna ah ayadoo aan sii wadno waxbarashadeenna iyo dib u milicsiga mowduucyadaan ha ahaato waxbarasho madaxbannaan, fasallo ama tababaro, ama ku dhaqan celin milicsiga asxaabta. Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan iyo istaraatiijiyada lagu abuurayo bay'ado dhaqan ahaan wax u tara, waxaad ka akhrisan kartaa qaar [tilmaamaha hagida](#).



NAQSHADA CAALAMIGA AH

1. Waa inaan abuurnaa shuruudo lagu taageeraayo ardayda SEL.

Inta badan waqtiga, marka fikirka Naqshadda Caalamiga ah ee Waxbarashada (UDL) laga fikiro, waxaan dareemi karnaa cabsi iyo culeys. Waxaan u maleyn karnaa in hirgelinta UDL ay ka dhigan tahay shaqo dheeraad ah iyo in arday kasta si gaar ah u wajaho. Nasiib wanaag, arrintu sidaas ma ahan gabi ahaanba. Taa badelkeeda, waxay la macno tahay “inaan siin karno” cunnooyin kaladuwan oo loogu talagalay ardayda si ay u helaan macluumaadka waxbarashada oo ay u muujiyaan waxaybarten siyaabo kala duwan. Tusaale ahaan, waxaad bixin kartaa cashar ay ardaydu wax ku akhrin karaan, ku daawan karaan filim, ku maqli karaan casharo oo ay ku qaban karaan xoogaa shaqo ah si ay u bartaan maaddada. Marka la gaaro waqtigii la qiimeyn lahaa aqoontooda maaddada, waxaad soo bandhigi kartaa ikhtiyaarka ah inaad qorto milicsiga, ka jawaabto jawaabaha qaarkood, aad cid la wadaagto waxyaabaha farshaxanka, ama dhameystirka wareysiga afka ee ku saleysan ujeedooyinka waxbarashada. Adigoo bixinaya xulashooyin, dhammaan bartayaashu waxay awoodaan inay helaan waxyaabaha sida ugu wanaagsan ugu shaqeeya, waxaadna tirtiri kartaa qaar badan oo kamid ah waxyaalaha baloogyada ah oo ka dhigi kara kamid noqoshada iyo shaqsiyeynta mid adag. Waqti ku qaadashada si aad uga fiirsato sidaad u soo bandhigi lahayd maaddo oo aad u qiimeyn lahayd aqoontu maahan inayadiga kuu ahaato mid wax walba qaadata ama shaqo dheeraad ah. UDL waa dabacsanaan oo loo dhan yahay dabecadda waxayna isku dhiibtaa inay barato xirfadaha SEL dabecaddaan awgeed. Markaan bixino xulashooyin iyo dhibco kala duwan oo ay ardaydu helaan, waxay awoodaan inay bartaan fikradaha SEL ayagoo u baranaaya siyaabo badan, raadinayana midka ayaga ugu fiican. UDL sidoo kale waa habka ugu habboon ee lagu daro falsafadda waxbarashada ciyaarta ku saleysan ee barnaamijkaaga ama fasalkaaga, maadaama cayaaruhu aysan ahayn gaadhiga ugu fiican ee waxbarashada laakiin sidoo kale asal ahaan loo dhan yahay oo dabacsan.

Carruurta da 'kasta leh waxay wax ku bartaan ciyaarta ugu fiican, ayadoo ku habboon baloogyada ugu yaraan 45 daqiiqo midkiiba. Ciyaaruhu waxay carruurta siiyaan fursad ay ku muujiyaan xaalado iyo waayo aragnimo si ay uga caawiyaan inay macno u yeeshaan dunida ku xeeran iyo booskooda dhexdooda. Markay ku ciyaarayaan guriga iyo dugsiiga, carruurta waxay bilaabaan inay hormariyaan is aqoonsigooda iyo sidoo kale kooxdooda iyo aqoonsigooda dhaqameed. Waxay daawadaan oo ayna ku dhaqmaan doorar kala duwan oo adduunka ah, iyagoo isku dayaya inay arkaan waxyaabaha ayaga ku wanaagsan. Ciyaarta dhexdeeda ayay carruurta ku dhaqmaan waxyaalo ay kamid yihiin iskaashiga, wadaagga iyo aragtida qaadashada. Ciyaarta, carruurta waxay sidoo kale ku dhaqmaan aqoonsiga iyo maareynta shucuurta, la socodka khilaafyada dadka kale, iyo dhisidda xiriiro macno leh oo ay la yeeshaan asxaabta iyo dadka waaweyn. In kastoo cayaaruhu u ekaan sikale marka loo eego da 'kasta-laga bilaabo ilmaha dhallaanka ah iyo ilmaha socod baradka ah ee barta dareenkooda, kuwa dugsiiga xanaanada oo ciyaaraya ciyaarta iska yeel-yeelka iyo khiyaaliga, ama carruurta da'da iskuulka ee ka qaybgalaya ciyaaraha iyagoo adeegsanaya caqli leh xeerar adag, ciyaaruhu waa dareenkeenna dabiiciga ah waxay na siiyaan fursadaha aan u baahannahay si aan u baranno rajooyinka dhaqameed ee adduunkeenna, iyo sidaan ugu habboonahay. Arrinta ugu wanaagsan, ciyaaruhu waxay bixiyaan aaladaha ugu dabiicsan ee kamid noqoshada iyo ku dhaqanka ku habboon hormarka, iyo sidoo kale jawaab celinta dhaqanka.

Ilmaha dhallaanka ah, waxaan ku taageeri karnaa waxbarashadaan ciyaar ahaan annagoo adeegsanayna luuqado badan calaamadinayana waxyaalo, anagoo adeegsanayna erayo sharraxaya iyo xitaa qabashada sheekooyin iswaydaarsi ah annagoo ka jawaabeyna hadalka canuggadiiradana saarayna marka ay wax xiiseynayaan. Markaan helno noocyada is dhexgalka ee la xariira adeegyada iyo soo celinta waxaan durba ka caawinaynaa dhallaanka inay fahmaan macnaha wadashaqaynta, aaminaadda xiriirka lala yeesho dadka nagu xeeran.



Ilmaha dhallaanka ah ee waaweyn, iyo sidoo kale ilmaha socod baradka ah, waxaan u furi karnaa adduun dhan fursadaha dareenka carruurta. Wali waa inaan isticmaalnaa luuqad sharraxaysa--gaar ahaan arrimaha la xariira sharraxaadda shucuurta iyo dareenka--waana inaan ku dhiirri gelinnaa carruurta inay muujiyaan naftoda anagoo tusaalaynaya oo ku tababarayna dareenno iyo khilaafyada waaweyn. Marka ay carruurta bilaabaan inay ballaariyaan erayadooda, waxaan siin karnaa erayo ay isticmaalaan si ay uga jawaabaan xaalado kala duwan oo si dabiici ah u soo baxa inta ay ciyaarayaan. Tusaale ahaan, haddii ilmuhu ka xanaaqo in ilmo kale qaatay boonbilahiisa uu jecelaa waxaa laga yaabaa inaan u tababbarnno annagoo dhehayna, “waan maqlayaa inaad ooynayso. Waad murugaysan tahay sababtoo ah saaxiibkaa ayaa kaa qaatay baabuurkaaga cagaarna. Waxaad saaxiibkaa ku dhihi kartaa ‘ma jecli’arrintaas.’ Ma iskudayi kartaa?” Annaga oo bixineyna tababar iyo taageero joogto ag, waxaan barnaa carruurta inay tahay arrin wanaagsan in dareen la yeesho iyo in aan wax ka qaban karno marka ay iyaga haysanno.

Dugsiga Xanaanada kahor iyo sannadaha da'da iskuulka hore, carruurta waxay ka gudbayaan ciyaar ka baxsan taas oo ku wajahan naftooda oo keliya, marka ay bilaabaan inay ku daraan kuwa kale riwaayadaan, xeerarka, doorarka iyo isku dhacyada imaan kara ayaa sii adkaanaya. Waxay noqon kartaa dareen dabiici ah in la isku khilaafdo lana is afgaranwaayo inta lagu jiro ciyaarta, laakiin kuwaani waa daqiiqado kaamil ah si looga caawiyo carruurta inay ku dhaqmaan xallinta dhibaatooyinka, fikirka muhiimka ah, iskaashiga, xirfadaha bulshada iyo xeerarka shucuureed ee jawi taageero iyo badbaado leh.

2. *Waa inaan hawshaan u qabanaa si wada jir ah.*

Sida ay dhigayaan mabaadiideena kale, waa inaan iskaashi la yeelano saaxiibadeena, qoysaska iyo daneeyayaasha kale si aan u abuurno dugsiyo iyo barnaamijyo u adeegsada Naqshadda Guud ee Waxbarashada sidii loogu talagalay. Si kastaba ha ahaatee, waa inaan sidoo kale wadashaqeyn la yeelanaa ardaydeena safka hore ee maankeenna UDL. Markaan la kaashanno ardaydeena anagoo sameynayna kormeer, su'aalaha ka waydiinayna yoolalkooda, waxaan abuuri karnaa jawi iyo manhaj ku habboon baahiyaha shaqsi kasta. Ciyaar ka ahaan, waxaan la kaashan karnaa ardayda si aan u abuurno xaalado cusub, ku dhaqano aqoonsiga iyo maareynta shucuurta, ku dhaqanka xallinta dhibaatooyinka iyo maareynta isku dhacyada iyo tixgelinta waxa agabka ama macluumaadka carruurta u baahan yihiin si kor loogu qaado cayaartooda macnaha leh loona qiimeeyo aqoontooda, awoodooda iyo baahidooda ay qabaan.

3. *Waa inaan dhisnaa kartida dadka waaweyn.*

Hirgelinta Naqshadda Caalamiga ah ee Waxbarashada, iyo sidoo kale waxbarashada ciyaarta ku salaysan ilmaha, waxay noqon kartaa arrin cabsi iyo culeys leh xataa macallinka, bixiyaha ama maamulaha ugu khibrada badan ayaa dareemi kara. Sanado badan oo “habab dhaqameedyo” badan oo xagga waxbarashada ah ayaa adkeeyay in loo sharaxo qiimaha shaqsiyeynta iyo ciyaarta carruurta kuwa aan ka warqabin. Markaan tixgelinayno dhisidda kartida dadka waawayn ee aagan, waa inaan nafteena oo kaliya barin qiimaha hababkaan, laakiin waa inaan barano sida aan ugu sharraxayno qiimaha dadka kale ee laga yaabo inay ka shakiyaan. Tan waxaa lagu samayn karaa wacyigelinta bulshada, waxaana lagu martiqaadi karaa waalidiinta iyo xubnaha bulshada si ay u arkaan shaqada carruurta ka qabanayso fasalka dhexdiisa, iyo waxaana macluumaadka lagu soo bandhigi karaa wargeysyada, bogagga internetka iyo qaababka kale ee wacyigelinta. Haddii UDL iyo waxbarashada ciyaarta ku saleysan ay u doonayaan waxbaridii hore ee aaggaaga raaxada, ku-dabaqida waxbarashada xirfadaha SEL waxay sahli kartaa kala guurka, maadaama marka loo eego waxa inta badan ay carruurta ka baranayaan cayaartooda ee ay xiriirka la yeelan karaan xirfadaha dareenka bulshada. Waxyaabaha ay kamid yihiin xallinta dhibaatooyinka, maareynta isku dhaca, barashada shucuurta iyo waaya aragnimada macnaha leh ee ay lahaayeen, iyo sidoo kale dejinta yoolal iyo helidda dhiirrigelin gudaha ah si loo dhammaystiro. Xirfadahaan dhammaantood waxaa sida ugu wanaagsan loogu bartaa ciyaarta, oo leh fursado badan oo dabacsan si loogu dhaqmo.



WAXQABADKA DHIBAATOYINKA LA OGSOON YAHAY

1. Waa inaan abuurnaa shuruudo lagu taageeraayo ardayda SEL.

Waxyeelada iyo walbahaarka sunta ah ayaa sidoo kale saamayn kara kartida ilmaha ee ku aadan waxbarashada iyo koriimada, waxaana laga yaabaa in xaaladahaan ay ku baaqaan taageero dheeraad ah marka ay timaaddo barashada iyo kudhaqanka xirfadaha dareenka bulshada. Markaan hubinno in habkeenu yahay waxyeelo la ogsoon yahay waxaan ka fogaan karnaa xaaladaha keena inay kacaan ama u horseedi kara dhaawac dheeraad ah ilmaha. Qaadashada habka dhaawacyada la ogsoon yahay waxay u ekaan karaan:

- Noqoshada qof dabacsan iyo wax u qabashada carruurta iyo qoysaska
- Wax ka badelida habkeena intaan macluumaad dheeraad ah sii baranyo
- Dib u milicsiga waxa shaqeynaaya iyo waxa aan shaqeynin
- Oggolaanshaha in hababkeenu aanu u shaqayn karin ilmo kasta

2. Waa inaan hawshaan u qabanaa si wada jir ah.

Markaan la shaqayni qoysaska la kulma dhaawacyada si aan ugu xirno iskaashatada bulshada ee bixin kara caawimaad, aana si toos ah taageero ugu fidinno ardayda kujirta dugsiyada dhexdiisa, iyo iskaashatada khubarada goobta si ay u bartaan hababka ugu wanaagsan ee loogu talagalay daryeelka dhaawacyada ogyahay, waxaan sii wadi karnaa xoojinta taageerooyinka aan awoodno inaan bixino, iyo inaan barano siyaabo cusub oo lagu caawiyo carruurta iyo qoysaska ay soo gaareen dhaawacyada.

3. Waa inaan dhisnaa kartida dadka waaweyn.

Dr. Patricia Jennings, oo ah borofeesar dhigta Jaamacadda Virginia ayaa sheegtay “in Waxbarashada shucuurta Bulshada ay tahay hal waxbarasho oo aysan dadka waawayn mas'uul ka ahayn inay baraan, laakiin waa inay ayagu noqdaan casharka.”⁴ Xaqiiqdii ma ahansuurtagal in carruurta la baro sida loo xakameeyo shucuurtooda, sida loo noqdo saaxiib naxariis leh ama adkaysi leh haddii aynaan anagu muujin sifooyinkaas. Waqt la qaadashada si loo milicsado awoodaha shucuureed ee bulshada iyo baahiyaha ayaa naga caawin doona inaan noqono tusaalooyinka SEL ee ugu fiican ee aan noqon karno.

Khabiir kale oo ku takhasusay daryeelka waxyeelooyinka la ogyahay iyo u adkeysiga dhaawacyada, Dr. Rick Robinson, ayaa sheegay “in Kaliya qofka wayn oo nidaamsan uu caawin kara nidaaminta ilmaha.”. Tan micnaheedu waa haddii aan rabno inaan ka caawino carruurta inay bartaan farsamooyin xeerka shucuurta oo caafimaad leh, ku habboon, waxaan u baahanahay inaan marka hore awoodno inaan farsamooyinkaas sameyno! Qaabeynta waa mid kamid ah aaladaha ugu wanaagsan ee waxbaridda ee aan haysanno, marka waa inaan waqti ku qaadanaa si aan u qiimeyno oo aan u hagaajino xirfadaha shucuurta bulshada haddii aan dooneyno inaan carruurta barno sida loo qiimeeyo loona hormariyo naftooda. Xaqiiqdii, dadka waawayn ee SEL ee leh kartida ayaa aad muhiim ugu ah barida carruurta SEL sida lagu muujiyay [daraasad ka timid](#)

⁴ Dhiirrigelinta Waxbarida & Waxarashada (2021 Abriil 26). *Macalinka SEL ee Shining a Bright Light*. <https://www.youtube.com/watch?v=S1RAZloU6es>



Yale waxaana daraasada lagu sheegay in marka macalinku kugu baro SEL fasalka dhexdiisa laakiin uusan asna sameyn, waxay sii xumaysaa natiijooyinka ardaydooda' ee ku aadan natiijooyinka SEL. Cilmi baaristaas waxay sidoo kale muujisay in macallimiinta waqti ku qaata si ay u xoojiyaan xirfadahooda shucuurta bulshada ay soo wariyaan dhibaatooyin yar, waana naxariis badan yihiin waxayna leeyihiin dulqaad, heerar sare oo guul ah oo lagu abuurayo jawi nabdoon oo soo dhaweyn leh taas oo u horseedda natiijooyin wanaagsan ardayda guud ahaan.

Ka maamul ahaan, tani waxay ka dhigan tahay kobcinta jawi ay macallimiinta iyo shaqaaluhuba lagu dhiirrigeliyo inay ka shaqeeyaan deganaanshaha, farsamooyinka xeerka, adkeysiga iyo isdaryeelida, iyo inay bixiyaan fursado horumarineed oo xirfadeed oo xoogga saaraya dhisidda awoodooda barashada shucuurta bulshada. Macallimiinta, shaqaalaha, daryeelayaasha iyo qoysaska, tani waxay ka dhigan tahay inaad maanka ku hayso oo aad ka warqabto marka laga yaabo inaad u baahan tahay inaad naftaada u samaysato hadafyo ku saabsan kobcinta iyo kor u qaadista xirfadahaan. Markaan anaga, bulsho ahaan, aan udub dhexaad u nahay waxbarashadan iyo koritaankan muhiimka ah, waxaan fariin u diraynaa carruurteena in aan qiimeyno oo mudnaanta siinno waxbarashada dareenka bulshada oo aan tusno carruurteena in xitaa dadka waawayn ay sii wadi karaan waxbarashada iyo koritaanka!

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan kobcinta awoodaada shucuurta bulshada, Waxbarashada Panorama waxay siisaa [macallimiinta iyo maamulayaasha Qalabka Aaladda](#) SEL ee Dadka Waaweyn.

Qayb kamid ah habka waxyeelada la ogsoon yahay, gaar ahaan marka laga shaqeynayo xirfadaha shucuurta bulshada, ayaa diiradda saareysa dhisidda rajada iyo adkeysiga. Rajadu waxay keenaysaa geedi socod fikir garasho leh oo ay weheliso shucuur ah in wax wanaagsan ay dhici doonaan.⁵ Aragtida Rajada ayaa sheegeysa in rajadu ka kooban tahay yoolal, hiigsiiyo, iyo wakiil. Yoolku waa ujeedo aan rabno inaan gaarno. Hiigsiga ayaa qeexaya sida looga gudbo barta A illaa barta B si loo gaaro yoolka la rabo; waxaa lagu gartaa oraahyo ay kamid yihiin, "I'll si aan helno hab taas lagu fuliyo."⁶ Hay'addu waa dhiirrigelinta ka dambaysa yoolka waxaana lagu gartaa bayaanno ay kamid yihiin "waan ogahay waan sameyn karaa."⁷

Adkeysiga waa awoodeena aan oga taqalusi karno walhabaarka, dhibaatooyinka iyo dhaawacyada aana kusii wadi karno inaan horey u socono. Marka aan nahay dad adkeysiga leh, waxaan awoodnaa inaan kor isku qaadno aana boorka iska jahno marka aan la kulano wax niyada naga jabiya, dhibaato ama walbahaar. Mararka qaar adkeysiga waxaa loo yaqaan inaadn awoodo "inaad kor isku qaado" kadib marka ay dhibaato kusoo wajahdo. Labadaba adkeysiga iyo rajadu waxay muhiim u yihiin in laga gudbo kaladuwanaanshaha iyo dhaawacyada waana agab muhiim ah oo naga caawinaaya inaan kor u qaadno nolasheena iyo mida carruurteena iyo ardayda.

⁵ Valle, M. F., Huebner, E. S., & Suldo, S. M. (2004). Qiimeyn dheeraad ah oo ku saabsan Qiimeynta Rajada Carruurta. Wargeyska Qiimaynta Cilmi nafsiga, 22 (4), 320-337.

⁶ Snyder (2001). Buug-gacmeedka Cilmi nafsiga Wanaagsan. Boqortooyada Ingiriiska: Wargeyska Jaamacada Oxford, 251.

⁷ Snyder (2001). Buug-gacmeedka Cilmi nafsiga Wanaagsan. Boqortooyada Ingiriiska: Wargeyska Jaamacada Oxford, 251.





Tilmaamaha La isticmaalo

Tixraaca Qaabka Shaqada

OSPI HEERARKA WAXBARASHADA SHUCUURTA BULSHADA (SEL)

Tixraac: Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadwaynaha ee Kooxda Shaqada SEL. “Heerarka Waxbarashada Shucuurta Bulshada, Halbeegyada, iyo Tilmaamaha.” Waxaa soo saaray Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadwaynaha 2020. PDF. Waxaaa laga soo maanguuriyay: <https://www.k12.wa.us/sites/default/files/public/studentssupport/sel/pubdocs/Standards%2C%20Benchmarks%20Indicators%20-%20creative%20commons.pdf>

TILMAAMAHA HORMARKA IYO WAXBARASHADA DHALLAANKA EE GOBALKA WASHINGTON (ELDGS)

Tixraac: Waaxda Waxbarashada Dhallaanka ee Gobalka Washinton, Xaafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadwaynaha iyo Thrive by Five Washington. “Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka ee Gobalka Washinton.” Waxaa soo saaray, Waaxda Waxbarashada Dhallaanka ee Gobalka Washinton, 2012. PDF. Waxaaa laga soo maanguuriyay: https://www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EL_0015.pdf

1. *Arrimo ku saabsan aniga, qoyskayga iyo dhaqankayga*

FC = qoyska iyo dhaqanka **SC** = ismaaninaada **SM** = is xakameynta **LL** = wax ka barashada waxbarashada

2. *Dhisida xiriiri*

IA = isdhexgal la sameynta dadka waawayn **IC** = isdhexgal la sameynta carruurta **IPO** = isdhexgal la sameynta dhalinta iyo dadka kale

SB = Dabeecada bulshada **PSCR** = xalinta dhibaataada iyo xalka khilaafaadka

3. *Taabashada, araga, maqalka iyo meelo marista*

ULM = isticmaalida murqaha waawayn **USM** = isticmaalida murqaha yaryar

4. *Ku korista nolal caawimaad leh*

DLS = xirfadaha nolashada ee joogtada ah **NH** = nafaqada iyo caafimaadka **S** = badqabka



5. *Isgaarsiinta (wax qorista iyo wax akhrinta)*


SL = hadalka iyo dhageysiga **R** = akhriska **W** = wax qorista










6. *Wax ka barashada aduunkayga*

K = aqoonta (garashada) **M** = xisaabta **S** = sayniska **SS** = waxbarashada bulshada **A** = farshaxanka

GOLD®

Tixraac: Teaching Strategies, LLC. (2016–2021). *GOLD®*. [nooca Elektarooniga ah]. Bethesda, MD: Qoraha. Qaybo ka mid ah cabbirrada *GOLD®* iyo matalaadda kooxaha midabka ee kujira dukumiintigaan ayaa dib loo daabacay ayadoo oggolaansho laga haysto Teaching Strategies, LLC. Isticmaal kasta oo kale ayadoon oggolaansho qoraal ah laga haysan Teaching Strategies, LLC si adag ayaa loo mamnuucay.

Tixraacyada lagu sameeyay dukumiintigaan ayaa ka baxsan baaxadda WaKIDS ee ujeedooyinka iyo cabbirrada. Cabirada WaKIDS ee lagu tilmaamay dukumiintigaan waxaa loo  calaamadeeyay si cad.

| | | |
|--|---|--|
|  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 SANO |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD |
|  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD |
|  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD |

Sida la isku duway dukumiintigaan

Hormarka iyo Waxbarashada Shucuurta Bulshada waa joogto. Xirfadaha horey laga barto lana adeegsado ayaa caawiya horumarinta waxbarashada hadda jirta iyo dhisidda xirfadda. Qaar kamid ah xirfadaha si degdeg ah ayay u kobcaan, halka qaar kale u baahan yihiin sanado si loo barto loona sameeyo. Qaab isku mid ah, carruurta qaar kamid ah waxay muujin doonaan kobac degdeg oo ay ka sameynayaan qaybo kamid ah aagaga SEL marka loo eego aagag kale. Dadka waawayn ee ka taageeraya carruurtawaxbarashadaan waxay dhisi karaan awoodaha carruurta ee hadda maadaama ay bixiyaan fursado badan oo ay ku bartaan xirfadaha SEL inta lagu jiro hawl maalmeedka.

Dukumiintigaan wuxuu baarayaa mid kasta oo kamid ah lixda heer ee OSPI SEL iyadoo loo sii maraayo hormarka laga bilaabo dhalashada illaa fasalka saddexaad. Billoowga qayb kasta oo ka mid ah dukumiintigaan waa halbeegga OSPI SEL oo wata sharraxaadiisa, macluumaad ku saabsan sababta xirfadahaan SEL ay muhiim u yihiin, iyo talooyinka macallimiinta, daryeelayaasha, xubnaha qoyska, iyo maamulayaasha si ay ugu taageeraan hormarinta xirfadahaan carruurta. Dhowr su'aalood oo milicsi ah kadib markaas ku martiqaad akhristayaasha inay qaataan daqiiqad si ay uga fiirsadaan awoodooda shucuurta bulshada, iyo sidoo kale inay si fiican u fahmaan meelaha ay, naftooda, korniinka ku sameyn karaan.

Dukumiintigu wuxuu markaa kadib u gudbayaa isgoosyada xirfadaha SEL heer tilmaame oo ka socda saddex dukumiinti oo haga: Heerarka OSPI SEL, *GOLD®*, iyo Gobalka WA ELDGs. Heer kasta oo hoos yimaada, macluumaadka waxaa abaabulay halbeegyada OSPI SEL. Tusaale ahaan, gudaha Heerka 1 aad: Is baraarujinta, waxaa jira saddex halbeeyo: 1A, 1B, and 1C. Halbeeg kasta, wuxuu leeyahay tilmaamayaal badan oo kobcinta xirfadda ee dugsiga hoose ah (dugsiga xanaanada ilaa fasalka



saddexaad). Tilmaamayaashaan waxaa lagu daray qayb kasta oo halbeegyo ah sida dhibcaha buleetka. Tilmaamayaasha badan ee ku hoos jira halbeeg kasta si ulakac ah ayaa la isugu daraa si looga fogaado ku celcelinta xirfadaha aasaasiga ah iyo in la hubiyo in dukumiintigaan uu yahay mid waxtar leh oo ah aalad waxbarid iyo barbaarin.

Heerarka OSPI SEL waxay wax ka qabtaan waxbarashada dhallaanka. Marka lagu daro hababka isgoysyada ee heerarkan *GOLD*® iyo Gobalka WA ELDGs, akhristaha wuxuu awoodaa inuu arko hormarinta xirfadda SEL ayadoo loo sii wado dib ugu noqoshada dugsiya barbaarinta, dugsiya socod baradka, iyo hormarka dhallaanka si loo arko sida xirfadaha loogu dhiso aqoontii hore ee carruurta. Sababtoo ah waxbarashadu waa mid firfircoon oo waxtar leh, waxaan filan karnaa in carruurta ay soo bandhigi doonaan xoogaa xirfadaha SEL ah oo da'dooda ku saleysan halka ay sidoo kale kor u qaadi doonaan xirfado gaar ah iyo meelaha kale ee ay ka hooseeyaan. Daawashada waxbarashada joogtada ah waxay u oggolaanaysaa dadka waawayn ee taageeraya carruurta fursadaha iyo isdhexgalka si ay uga caawiyaan inay gaaraan yoolkooda xigga.

Ugu dambayntii, akhristayaashu waxay ogaan doonaan ku celcelinta xirfadaha SEL inta u dhexaysa qaybaha halbeegyada. Tani waxay iftiiminaysaa xaqiiqda ah in xirfado badan oo SEL ah ay isku xiran yihiin, gaar ahaan heerkan aasaasiga ah ee waxbarashada dhallaanka. Tusaale ahaan, cunugga ka shaqeynaya sidii uu u ogaan lahaa sida dareenada kaladuwan ay u dareemaan jirkiisa (is wacyigelinta) ayaa sidoo kale ka shaqeynaya xirfadaha ismaamulka maxaa yeelay si loo habeeyo jawaabta shucuureed, waa inay marka hore ogaadaan.

HEERARKA →

Shakhsigu wuxuu awood u leeyahay inuu aqoonsado shucuurtiisa, hantidiisa shaqsiyeed, aagagga koritaanka, iyo ilaha iyo taageerooyinka dibedda ee imaan kara

HALBEEG →

Bartilmaameedka Is Maareynta 1^a:

Wuxuu muujiyaa wacyiga iyo fahamka mid kamid ah shucuurta iyo shucuurta saameynta dabeecada.

TILMAAMAHA →

WAXBARASHADA DHEXE EE DHALLAANKA

Haddii aan helo caawimaada dadka waawayn, waxaan...

- Awoodaa inaan fahmo, aqoonsado, aana magacaabo shucuurtayda, dareenkayga, iyo fikirkaayga.
- Awoodaa inaan fahmo sida shucuuraha, dareenada, iyo fikirka kaladuwan u dareemo jirkayga.
- Awoodaa inaan hadal ahaan ku muujiyo shucuurtayda ama dareenadayda.
- Awoodaa inaan qeexo kaladuwanaanshaha u dhexeeya maskax kobac sameyneysa iyo mid aan sameyneyn.



Yaa isticmaali kara Dukumiintigaan

Naqshadaynta nidaamkaan, waxaan doonaynay inaan aqoonsano in dukumiintiyada badan oo la mid ah laga yaabo inaysan u ahayn kuwo la heli karo ama si sahlan loogu dheefsan karo dhammaan dadka doonaya inay adeegsadaan. Sidaan oo kale, waxaan si ula kac ah ugu dhaqaaqnay inaan abuurno aalad fududaynaysa in la akhriyo, la isticmaalo, lana dalbado dhammaan kuwa ku hawlan oo taageera carruurta kana taageera kobcinta shucuurta bulshada. Hoos, waxaad ka baran kartaa wax badan oo ku saabsan sida dukumiintigaan ay u adeegsan karaan daneeyayaal kaladuwan oo ay ku jiraan qoysaska, tababarayaasha, macalimiinta iyo maamulayaasha dugsi ama degmada.

QOYSASKA IYO DARYEEL BIXIYAASHA

Qoysasku waxay adeegsan karaan dukumiintigaan si ay ula shuraakoobaan macalimiinta ilmahoodaiyo dugsi si ay u taageeraan koriinka shucuurta ee ilmahooda, iyo sidoo kale adeegsiga talooyinka ku jira halbeeg kasta si ay gacan uga geystaan taageerida waxbarashada ilmahooda ee guriga. Intaa waxaa dheer, qoysasku waxay adeegsan karaan ilaha, su'aalaha milicsiga iyo dhiirrigelinta si ay u bartaan awoodooda shucuurta bulshada oo ay go'aamiyaan haddii ay jiraan aagag ay jeclaan lahaayeen inay wax badan ka bartaan.

Qoyska ilmahawaxay keenaan khibrad gaar ah oo ku saabsan waayo aragnimada ilmaha, baahiyaha koritaanka, awoodaha iyo dhaqanka, daryeelayaashooduna waa macallimiintooda ugu horreeya uguna muhiimsan. Cilmi baaristu waxay muujineysaa in marka waxbarashada shucuurta bulshada ay ku fiddo guriga, in carruurta ay aad ugu guulaystaan kobcinta iyo kor u qaadista xirfadahaas. *Dugsiyadu waxay u baahan yihiin qoysasku inay iskaashadaan oo iskana kaashadaan si loo hubiyo in go'aanooda iyo hab raacyadooda ay ka kooban yihiin dhammaan qoysaska, dhaqamada iyo carruurta bulshada dhexdeeda.*

Daryeel bixiyaasha ama xubin qoyska ka mid ah ka ahaan, waxaad ilmahaaga ka taageeri kartaan koritaankaidinkoo adeegsanaaya ciyaar macno leh halkaas oo aad ku samayn karto dhacdooyin ama aad kaga falcelin karto ka jawaabidda xaalado kala duwan, marba marka aad cayaarayso, idinkoo isla akhrinaya buugaagta iyo samaynta isku xidhka waayaha dunida ee dhabta ah, iyo qaadashada waqti si loo aqoonsado loona magacaabo caadifadaha. Maareynta dareenada waawayn, barashada sida looga fikiro si taxaddar leh iyo xallinta dhibaata, iyo sida loo sameeyo xiriir xoogan, kalsooni iyo ixtiraam leh ayaa dhammaantood ah xirfado aad muhiim u ah oo qoysasku ku tababari karaan guriga.

MACALIMIINTA, ADEEG BIXIYAASHA DARYEELKA IYO XIRFADLAYAASHA KALE EE P-3

Dukumiintigaan waxaa loo naqshadeeyay inuu yahay aalad tixraac oo loogu talagalay maamulayaasha iyo macalimiinta si ay ugu adeegsadaan qiimeynta iyo fahamka marxaladaha horumarineed iyo filashooyinka ardayda. Intaa waxaa sii dheer, dukumiintigaan ujeedadiisu waa inuu ka caawiyo dadka waaweyn inay sameeyaan koritaan awoodooda shucuur ee bulshada la xariira. Ka sokoow habraacyada, qayb kasta waxaa ku jira fikrado ku saabsan sida loo qaabeeyo oo loo taageero barashada xirfadda ee fasalka dhexdiisa iyo su'aalo milicsi ah oo loogu talagalay adiga bare ka ahaan marka aad tixgelinayso awoodahaaga iyo baahiyahaaga kujira aaggan. Markaad waqti ku qaadato si aad u qiimayso xirfadahaaga, waxaad si fiican oo awood leh u fahamaysaa meeshaad taageerooyinka oga baahan tahay oo adiga kuu gaar ah waxaadna si fiican u adeegsan kartaa awoodahaaga si aad u taageerto ardaydaada.



Adoo tixraaca habraaca, u fiirso marxaladaha ka baxsan kooxda da'da ee aad guud ahaan wax barto maadaama aad si gaar ah wax u barayso ardayda. Waan ognahay in dhammaan carruurta ay yihiin kuwo qaas ah iyo sidoo kale ayna hayaan wadada waxbarashadooda. Kuwa aan wali heer sare ka gaarin waxbarashada da'dooda ama heerka fasalkooda, fiiri qaybta kahor si aad u ogaato xirfadaha aad dhisi karto. Kuwa horey u bartay xirfado ka sarreeya heerkii ay filayeen ee hormarka, waxaad hore u sii eegi kartaa waxa soosocda ee xigga waxaadna hirgelin kartaa xeelado lagu taageerayo horumarkaas.

TABABARADA IYO BARBAARIYAASHA

Markaad la shaqaynayso xubnaha shaqaalaha kamidka ah ama ka qaybgalayaasha tababarka, aad bay waxtar u yeelan kartaa inaad haysato aalad tixraac sida tanoo kale ah si aad u taageerto wada hadalka iyo milicsiga. Waxaad ka oggaan doonaa qayb kasta in uu jiro bog talooyin ah oo lagu taageerayo hormarka iyo sidoo kale su'aalaha milicsiga ee dadka waawayn marka ay ka shaqeynayaan sidii ay u dhisi lahaayeen kartidooda SEL. Tababare ahaan ama macallin ka ahan, waxaad u adeegsan kartaa su'aalahaan si aad u fududeyso wada xaajoodaya, iyo sidoo kale u adeegsiga sheekada iyo talooyinka sida qoraal gacmeedyo si aad uga caawiso macallimiinta, maamulayaasha, qoysaska iyo adeeg bixiyeyaasha xanaanada carruurta inay yeeshaan bog lagu heli karo si degdeg ah, oo si sahlan loo akhrin karo si loogu caawiyo inay wax baranayaan. Agabkaan waxa kale oo uu noqon karaa mid ku caawiya tababare ahaan ama barbaariye ahaan markaad taageerayso kuwa aaga jooga arrimaha la xariira fahamka wanaagsan ee qalabka qiimeynta kala duwan, tixraacyada iyo marxaladaha hormarineed ee jira.

MAAMULAYAASHA

Macalimiinta, qoysaska iyo tababarayaasha ayaa kaligood wax badan samayn kara marka ay timaaddo taageerida waxbarashada dareenka shucuurta tayada leh ee fasalka dhexdiisa lagu bixiyo, guriga ama barnaamijka daryeelka carruurta. Maamulayaashu waa qasab inay diyaar u yihiin inay bixiyaan qalabka, waqtiga la ilaaliyo iyo maalgelinta si loo abuuro isbaddel waara muddo. Maamulayaashu waxay dukumiintigaan u isticmaali karaan qorsheynta iyo hirgelinta taageerooyinka SEL, ee ku aadan milicsiga muraajaceynta ee shaqaalaha, qoysaska, iyo si loo hoggaamiyo wada hadal ku saabsan xogta SEL iyo natiijooyinka dugsigooda ama degmadooda. Maamulayaasha waxay sidoo kale hubin karaan in jadwal maalmeedka macallinkasta ama jadwalkiisu uu ka tarjumaayo in carruurta la siiyo 45 daqiiqo oo ah waqti ay ku ciyaaraan ciyaar bilaash ah oo ay doortaan si ay u taageeraan hormarinta SEL iyo xirfadaha kale.

Maamulayaasha waxay sidoo kale isticmaali karaan dukumiintigaan si ay u tixgeliyaan manhajyada dareenka bulshada (kuwaas oo badankooda laga heli karo [liiska barnaamijyada CASEL SElect](#)) oo ku habboon falsafadda iyo xiisaha shaqaalahooda iyo qoysaska ay u adeegaan. Hal hab oo ay sameeyaan Xarunta Yale ee loogu talagalay Cilmiga Dareenka oo loo yaqaan [RULER](#) “ayaa looga golleeyahay in lagu shubo mabaadi'da cilmiga shucuurta nidaamka difaaca ee dugsiyada xanaanada ilaa fasalka 12 aad.”⁸ Marka maamulayaasha iyo hogaamiyaasha iskuulka u qaataan dareenka bulshada si dhab ah ayna awooda saaraan si ay ugu dabaqaan nidaamka, waxaan xoojin karnaa aasaaska waxbarashada oo dhan lagu dhisi karo.

Hirgelinta manhajka shucuurta ee bulshada waa hab wayn oo lagu kordhin karo wax ku oolnimada iyo natiijooyinka dugsiyada iyo degmooyinka, iyo adeegsiga dukumiintigaan oo lala kaashanaayo manhajka iyo Qorshayaasha Hagaajinta Dugsigaaga waxay horseedi kartaa isbadel wanaagsan oo waara, gaar ahaan marka la

⁸ Ycei.org



isticmaalaayo xeeladaha SEL ee gaarka ah ee la xariira dhammaan shaqaalaha, oo ay ku jiraan shaqaalaha taageerada bixiya sida darawalada basaska, cunto kariyayaasha, xirfadlayaasha iyo kuwa kale. Isku day inaad la xariirto kuwa kale ee kujira dugsiya xanaanada illaa fasalka 3aad si aad u aragto habraacyada SEL iyo manaahijtii horey loo adeegsan jiray, oo iskaashi la samee si aad u dhiso xiriir waara si aadna u taageerto carruurta iyo qoysaska bulshada dhexdeeda.

Ugu danbeyntii, hal tixgelin oo muhiim ah oo ku jirta gacmaha maamulayaasha iyo hoggaamiyayaasha dugsiyada ayaa ah maalgelinta iyo sida loo adeegsan karo si loo sameeyo saameyn macno leh. [Sida laga soo xigtay daraasad uu sameeyay dhaqaalayahan James Heckman](#), doolar kasta oo aan ku maalgelinno waxbarashada dhallaanka (ilmaha inta aysan dhalan ilaa fasalka saddexaad), waxaan ku kaydinaa \$7 adeegyada waxbarashada ilmaha, daryeelka iyo maalgelinta kale ee mustaqbalka. Marka aan maalgelino ardaydeena yaryar iyo kuna korino nolal guul leh, waxaan hubinnaa in carruurteenu aysan diyaar u ahayn dugsiya oo kaliya, laakiin ay diyaar u yihiin noloshu iyo wixii la socda oo dhan.





Heerka 1 aad: Is Baraarujinta

UJEEDOOYINKA MUHIIMKA AH:

Aqoonso oo magacoow dareenada; baro sida dareenadu u saameeyaan jirka; hadal ahaan ku muuji dareenada, qeex fikradaha

SABAB: Xirfadaha shucuurta bulshada waa in si cad loo taageero loona barto, si lamid ah habraacyadeena kale ee xirfadaha, sida akhriska iyo xisaabta. Caruurta yaryar waxay bartaan is baraarujin, aad u wayn, waxayna ka bartaan isdhexgalka ay la sameeyaan dadka waawayn. Dadkaas waawayn waxay qayb wayn ka qaataan inay carruurta ka caawiyaan inay bartaan is baraarujinta iyo dareen adag oo shaqsiyaad iyo aqoonsiga dhaqanka. Marka ay bartaan naftooda iyo dhaqankooda kadib marka ay dhashaan, carruurta yaryar waxay bartaan astaamaha jireed, maskaxeed, caadifadeed, dabeecadeed, iyo shakhsiyada naftooda iyo kuwa kaleba, oo ay kujiraan jinsiga, jinsiyadda, iyo kartida.

SIDEE: Si loo koriyo carruurta, dadka waawayni waa inay abuuraan dareen badbaado leh ayagoo adeegsanaya bii'o ku habboon, hababka la saadaalin karo, is dhexgalka iyo filashooyinka. Saadaalintaas noocan oo kale ah waxay ka caawisaa carruurta inay bartaan waxyaabaha laga filaayo, ayagoo kalsooni ku abuuraya naftooda. Arrin u muuqan karta arrin fudud oo noo muuqda dadka waawayn ka ahaan, ayaa laga yaabaa inay carruurta yaryar ku wareeraan. Carruurta waxay u baahan yihiin dad waawayn oo dulqaad leh oo siin kara xusuusin badan iyo fursado ay ku bartaan inay dareemaan dareenkooda iyo sahaminta aqoonsigooda. Marka la sameeyo sidaas waxay kor u qaadeysaa jawi ay carruurta ku raaxeystaan ayna dareemaan deganaan iyo dareen lahaansho inta ay sii wadaan inay dhisaan xirfadahooda is xakameynta iyo fulinta.

Marka la eego arrintaas, waa wax iska caadi ah in carruurta la kulmaan shucuur xoog badan oo aad u daran, kuwa ayaga iyo anagaba ku adkaan kara. Markay la kulmaan shucuurtaan xoogan ayna taageero ka helaan qof walaal oo ay aamini karaan, carruurta waxay bartaan sida loo aqoonsado loona muujiyo dareenkooda si habboon. Taageeradaan inta lagu jiro dareenka xooggan waxay kale carruurta ka caawisaa inay u doodaan naftooda ayagoo sharfaya oo aqoonsanaya xuquuqda iyo baahiyaha dadka kale. Aad bay muhiim ugu tahay dadka waawayn inay go'aamiyaan baahida uu ilmuhu isku dayayo inuu daboolo ama xirfadda uusan ilmuhu weli baran. Fahamkaan qotada dheer wuxuu ka caawiyaa dadka waawayn inay aqoonsadaan xeelado wax ku ool ah, taageerooyin iyo waxqabadyo si gaar ah loogu talagalay si lagu daboolo baahiyahailmaha. Waqti kadib, carruurta waxay awood u yeelan doonaan inay dareenkooda ku gudbiyaan qaab hadal ahaan ama tilmaamid ah iyo muujin, halkii ay ahaan lahaayeen jawaab la'aan ama ku gacan sareyru lahaayeen dadka kale.

Qaababka loo Caawiyo



Waalid ahaan, daryeele ama macalin ahaan, fadlan:

- Dhis xiriiryo iyo hilloow dhab ah oo aad la yeelanayso ilmo kasta adigoo baranaya ayaga iyo danahooda.
- Qaado [hogaaminta ilmaha](#), marka ay sidaas habboon tahay.
- Samee wada hadal furan oo ku saabsan jinsiga, isirka, jirka, dhaqanka, iyo kaladuwanaanshaha kale ee ilmuhu arko. Xiisaha moodheelka. Si aad u hesho maqaalo iyo qorshayaasha casharada, fadlan sahmi ilahaan soo socda: [learningforjustice.org](#)
- Akhri buugaag ama ku hees heeso muujinaya shakhsiyaad kala duwan iyo kooxaha dhaqamada adoo u sameynaaya wanaagsan oo sax ah.
- Calaamadee dareemadaada iyo sidoo kale shucuurtacarruurta.
- Sharaxaad ka bixi waxa aad dareemayso ee aad ka dareemayso jirkaaga marka aad la kulanto shucuur xooggan, iyo sidoo kale waxa aad ku aragto carruurta marka ay la kulmaan shucuur xooggan.
- Inta lagu jiro waqtiyada xasilloon ee maalintii, waqti ku bixi calaamadeynta, sharaxida oo kala hadal ilmaha sida dareenada kala duwan ay u muuqdaan una dareemaan.
- Sii xulashooyin, oo ay kujiraan cunto, cabitaan ama wakhti aad ku nasato maadaama carruurta aysan garan karin baahidooda jir ahaaneed.
- Sii dhiirigelin iyo falcelin gaar ah.
- Ku dhiirigeli oo tus waxqabadyada/nashaadaadka is dejinta ku habboon.
- Ku muuji dareenka iyo garashada codkaaga, wajigaaga, iyo luuqada jirkaaga.
- La soco fikradahaaga, dareenkaaga iyo shucuurtaada. Daryeelka carruurta yaryar waxaa laga dhaxlaa abaalmarin iyo caqabado labadaba. Qaado nasasho marka aad u baahan tahay oo mudnaanta sii daryeelkaaga gaarka ah.

Milicsiga iyo Nidaamka



Sidee dareenada xooggan u saamayn karaan qofkamaankiisa ama dabeecadiisa xaalada?

Waa maxay qaababka wanaagsan ee aan ku wajihi karno dareenadaas?

Goorma ayuu dareenka xoogan saameeyaa xiriirkaaga gaarka ah? Maxaad baratay?

Hababkee carruurta ka caawin kara inay bartaan ayna aqoonsadaan dareenadooda?



Heerka 1 aad: Tilmaamaha Isbaraarujinta

Shakhsigu wuxuu awood u leeyahay inuu aqoonsado shucuurtiisa, hantidiisa shaqsiyeed, aagagga koritaanka, iyo ilaha iyo taageerooyinka dibedda ee imaan kara










Bartilmaameedka Is Maareynta 1A:

Wuxuu muujiyaa wacyiga iyo fahamka mid kamid ah shucuurta iyo shucuurta saameynta dabeecada.

WAXBARASHADA DHEXE EE DHALLAANKA

Haddii aan helo caawimaada dadka waawayn, waxaan...

- Awoodaa inaan fahmi, aqoonsado, aana magacaabo dareenadayda, shucuurtayda, iyo fikirkayga.
- Awoodaa inaan fahmo sida shucuuraha, dareenada, iyo fikirka kaladuwan u dareemo jirkayga.
- Awoodaa inaan hadal ahaan ku muujiyo shucuurtayda ama dareenadayda.
- Awoodaa inaan qeexo kaladuwanaanshaha u dhexeeya maskax kobac sameyneysa iyo mid aan sameyneyn.

| Gobalka Washington Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs) | | GOLD® | | |
|--|--|--|---|---|
| | |  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD |
| | |  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD |
| | |  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD |
| Fasalka 3aad: Sii wad barashada xirfadaha ee isdaba joogaan. Si gaar ah wax u bar carruurta laga yaabo inaysan aqoon xirfadihii hore ama kuwa ka faa'iideysan doona tababar dheeraad ah. Si aad u hesho carruurta diyaarka u ah inay bartaan xirfadaha dheeraadka ah ee aaga, tixraac qaybta "Dugsigga dhexe ee Danbeeya" ee Heerarka OSPI SEL . | | <i>Heerarka GOLD® waxay wax ka qabtaan xeerarka dabeecadaha iyo shucuurta. Xiriirkaan wuxuu u dhaw yahay Heerka 2 aad ee OSPI SEL: Is Maareynta. U gudub bogga 31 aad si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.</i> | | |
| Fasalka 2aad: Sii wad barashada xirfadaha ee isdaba joogaan. Si gaar ah wax u bar carruurta laga yaabo inaysan aqoon xirfadihii hore ama kuwa ka faa'iideysan doona tababar dheeraad ah. Si aad u hesho carruurta diyaarka u ah inay bartaan xirfadaha dheeraadka ah ee aaga, tixraac qaybta "Dugsigga dhexe ee Danbeeya" ee Heerarka OSPI SEL . | | | | |



Gobalka Washington
Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)

GOLD®

| | | |
|-------------------------|-----------------------|--------------|
| XILIGA DHALASHA ILLAA 1 | DUGSIGA BIRIMADA 3 | FASALKA 1AAD |
| 1-2 SANO | DUGSIGA XANAANADA-K 4 | FASALKA 2AAD |
| 2-3 SANO | DUGSIGA XANAANADA | FASALKA 3AAD |

Fasalka 1aad:

1SM: Waxat fahmaan sida jirka iyo wajiga u muujiyo shucuurta kaladuwan.

Dugsiga Xanaanada:

1SC: Waxay aqoonsadaan oo muujiyan dookhyadooda, fikradahooda iyo dareenkooda, haddii ay ku habboon yihiin dhaqanka ilmaha.

1SM: Waxay aqoonsadaan shucuurta waxayna isticmaalaan erayo si aad u qeexaya.

Dugsiga Birimada (4-5):

1SM: Waxau siidaayaan cadaadiska shucuureed ee gacmaha ama joogitaanka qof wayn ah oo daryeela (da'daan, waxaa laga yaabaa in ilmuhu ka niyad jabay inuu sidaas sameeyo oo ay ku adkaato sidii hore.)

1SM/2SB: Waxay ku xiriiriyaan shucuurta muujinta dhaqdhaqaaqa wajiga.

1SM/6A: Waxay muujiyaan hal ama laba dareen oo ah doorka waaya aragnimada nolosha iyo dhaqdhaqaaqa iyo jeeska.

5SL: Waxay isticmaalaan erayo si ay ugu qeexaan shucuurta (sida farxada, murugada, daalka iyo caajiska).

Dugsiga Birimada (3-4):

1SM: Waxay siidaayaan ama dib u hagaajiyaan xiisadaha shucuureed.

5SL: Waxay ka hadlaan baahidooda iyo dareenkooda ayagoo ku muujinaaya erayo iyo muuqaal.

1SM: Waxaa ku adkaata inay ku shaqeeyaan cadaadis, gaajo, bakhdin, niyad jab, xanaaq, iw, taasoo keenta dabecad waxyeelo leh, waxyeello iyo xanaaq leh.

5SL: Waxay xiriirka ku sameeyaan luuqada jirka, wajiga, codka iyo erayada.

Heerarka GOLD® waxay wax ka qabtaan xeerarka dabecadaha iyo shucuurta. Xiriirkaan wuxuu u dhaw yahay Heerka 2 aad ee OSPI SEL: Is Maareynta. U gudub 31 aad si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.



Gobalka Washington
Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)

GOLD®

| | | |
|-------------------------|-----------------------|--------------|
| XILIGA DHALASHA ILLAA 1 | DUGSIGA BIRIMADA 3 | FASALKA 1AAD |
| 1-2 SANO | DUGSIGA XANAANADA-K 4 | FASALKA 2AAD |
| 2-3 SANO | DUGSIGA XANAANADA | FASALKA 3AAD |

Ilmaha Socod baradka ah (16–36 billood):

1SC: Waxay si iskood ah u magacaabaan una muujiyaan dareeno badan, dadka ay garanayaan, xayawaanada.

1SC: Waxay raadsadaan deganaanta dadka waaweyn iyagoo muhiim u ah marka ay ku jiraan xaalado cusub ama aan raaxo lahayn, ama marka ay gargaarka u baahan yihiin, ama dareemayaan dareen xoog leh.

1SM: Waxay muujiyaan dareen xoog leh marka ay xanaaqsan yihiin.

Ilmaha Yaryar (0–18 billood):

1FC: Way Ooyaan si ay u muujiyaan ama oga nafisaan dareenka kala duwan.

1SM: Waxay isku dejiyaan ereyada sida hadaaqaya, ama hadal muujinta, nuugista ama salaaxista buste ay jecel yihiin ama shay kale.

5SL: Waxay u ooyaan siyaabo kaladuwan iyadoo ku xiran haddii uu gaajaysan yahay, xanuun qabo ama daalan yahay.

5SL: Waxay isticmaalaan dhawaaqyo kaladuwan si ay u muujiyaan shucuurta.

1SM: Waxay Kordhiyaan kalsooni dheeraad ah marka lagu dhiirigeliyo inay sii daayaan dareen xoog leh.

1SM: Waxay muujiyaan oo ka jawaabaan dareenka kala duwan.

2SB: Way qoslaan marka dadka kale ay qoslaan.

6S: Waxay muujiyaan layaab, farxad, xamaasad iyo xiiso.

Heerarka GOLD® waxay wax ka qabtaan xeerarka dabecadaha iyo shucuurta. Xiriirkaan wuxuu u dhaw yahay Heerka 2 aad ee OSPI SEL: Is Maareynta. U gudub 31 aad si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.











Bartilmaameedka Is Maareynta 1B: Waxay muujisaa ka warhaynta aqoonsiga qof ahaaneed iyo kan guud ee ka kooban awoodaha, meelaha koritaanka, himilooyinka iyo hantida dhaqanka iyo luqadda.

WAXBARASHADA DHEXE EE DHALLAANKA

Haddii aan helo caawimaada dadka waawayn, waxaan...









- Awoodaa inaan aqoonsado danahayga.
- Awoodaa inaan aqoonsado waxa awooduhu yeeyihiin, iyo awoodahayga.
- Awoodaa inaan aqoonsado muhiimadda ay ii leedahay ka mid noqoshada kooxda dhaqamadayda.

| <p>Gobalka Washington Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)</p> | <p>GOLD[®]</p> <table border="1"><tr><td> XILIGA DHALASHA ILLAA 1</td><td> DUGSIGA BIRIMADA 3</td><td> FASALKA 1AAD</td></tr><tr><td> 1-2 SANO</td><td> DUGSIGA XANAANADA-K 4</td><td> FASALKA 2AAD</td></tr><tr><td> 2-3 SANO</td><td> DUGSIGA XANAANADA</td><td> FASALKA 3AAD</td></tr></table> |  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD |  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD |  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD |
|--|--|---|--|--|--|---|--|--|---|--|
|  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD | | | | | | | | |
|  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD | | | | | | | | |
|  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD | | | | | | | | |
| <p>FASALKA 3AAD: 1FC: Waxay awoodaan inay qoraal sheeko ayaga ku saabsan kuna hadlaysa qoyskilmaha, dhaqanka iyo bii'ada.</p> | <p>1c  </p> <p>Waxay si sax ah u aqoonsadaan awoodaha iyo caqabadaha (is qiimeynta, is dhiirigelinta); waxay hormariyaan oo ka shaqeeyaan hadafyada shaqsiyeed.</p> <p>11d  </p> <p>Waxay muujiyaan xiisaha dhacdooyinka sii kordhaya ee ka baxsan waaya aragnimada tooska ah ayagoo abuuraya su'aalo iyo baadhitaanka ku saabsan mawduuca.</p> | | | | | | | | | |



Gobalka Washington
Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)

GOLD®

| | | |
|---|---|--|
|  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD |
|  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD |
|  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD |

Fasalka 2aad:

1FC: Waxay la wadaagaan qoys ama caado dhaqameed, dheesha, heeso ama muraajacada fasalka, saaxiibbada iyo qoyska.

1FC: Weydiiyaan su'aalo ku saabsan taariikhda qoyskooda iyo dhaqankooda.

11d  

Waxay muujiyaan xiisaha dhacdooyinka sii kordhaya ee ka baxsan waaya aragnimada tooska ah ayagoo abuuraya su'aalo iyo baadhitaanka ku saabsan mawduuca.

1c   

Waxay sameeyaan xirfadaha si ay u gaaraan heerka la rabo ee guusha shaqsiyeed.

11d  

Waxay muujiyaan xamaasada waxbarashada waxyaalo cusub waxayna raadiyaan fursado lagu helo aqoon iyo xirfado cusub; waxay waydiiyaan su'aalo furan oo ku saabsan waxyaabaha ku heerarsan iyo dhacdooyinka maalin kasta.

Fasalka 1aad:

1FC: Waxay asxaabta ama dadka waawayn u sheegaan waxyaabaha ku saabsan qoyska ama dhaqanka.

1c   

Waxay sameeyaan xirfadaha si ay u gaaraan heerka la rabo ee guusha shaqsiyeed.

11d  

Waxay muujiyaan xamaasada waxbarashada waxyaalo cusub waxayna raadiyaan fursado lagu helo aqoon iyo xirfado cusub; waxay waydiiyaan su'aalo furan oo ku saabsan waxyaabaha ku heerarsan iyo dhacdooyinka maalin kasta.



Gobalka Washington Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)

GOLD®

| | | |
|---|---|--|
|  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD |
|  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD |
|  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD |

Dugsiga Xanaanada:

1FC: Waxay ku faanaan oo ay yaqaanaan dhaxalkooda isirka/dhaqanka. Waxay aqoonsadaan kooxaha kaladuwan ee qowmiyadaha/dhaqanka.

1FC: Waxay aqoonsadaan caadooyinka iyo dhaqamada qoyska.

1SC: Waxay aqoonsadaan oo muujiyaan dookhyada u gaarka ah, waxa ay jecel yihiin iyo waxa ay neceb yihiin, fikradaha iyo dareenka, haddii ay ku habboon tahay dhaqankailmaha.

11d 

Waxay muujiyaan rabitaan ah inay wax ka bartaan mawduucyada iyo fikradaha kala duwan.

Dugsiga Birimada (4-5):

1FC: Waxay ku faanaan hal buurka qoyskooda waxayna dareeyaan dadka kale. Waxay fahmayaan in qoysasku kaladuwan yihiin.

1SC/6K: Waxay qeexaan waxyaabaha ay jecel yihiin iyo waxyaabaha ay xiiseeyaan.

1LL: Waxay sameeyaan sa socod; waxayna xiiseeyaan in wax la tijaabiyo.

5SL: Waxay muujiyaan aragtidooda gaarka ah, oo ay jecel yihiin iyo waxa aysan jeclayn ayagoo adeegsanaya erayo, tilmaamo iyo/ama sawirro.

6SS: Waxay sharaxaan xubnaha qoyska waxayna fahanmaan xiriirka fudud (sida, "Marika waa walaalkay.")

6SS: Waxay la qabsadaan doorarka xubnaha kala duwan ee qoyska inta lagu jiro riwaayadda. Waxay qorsheeyaan kaalin kasta waxa ay qabato kadibna way meel mariyaan.

6SS: Sawir qoyskooda, si uu ilmuhu u fahmayo.




11d 

Waxay muujiyaan rabitaan ah inay wax ka bartaan mawduucyada iyo fikradaha kala duwan.



Gobalka Washington Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)

GOLD®

| | | |
|---|---|--|
|  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD |
|  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD |
|  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD |

Dugsiga Birimada (3-4):

1FC: Xususnoow dadka muhiimka u ah nolosha ilmaha.

1FC/6SS: Magacoow oo aqoonso xiriirka kala dhexeeya sida (waalidka, walaalka, ina adeerka, iwm.) Inta badan xubnaha qoyska, oo ay ku jiraan qoys balaaran.

1FC: Ogoow muhiimadda ay leedahay dabaaldegada dhaqanka iyo dhaqamada.

1FC: Muuji ama ka hadal shay ka yimid qoyska ama dhaqanka.

1SC: Muuji jeceylka/nacaybka shaqsiyadeed iyo waxqabadyada la jecel yahay/la yaqaan.

1SC: Waxay si cad u sheegaan magaca koowaad iyo kan dambe.

1SC: Waxay yaqaanaan naftooda oo qayb ka ah qoyska, kooxda ruuxiga ah, dhaqanka, bulshada, iyo/ama koox kale oo qoysku ka tirsan yahay.

1SC: Waxay isku arkaan inay yihiin qof muhiim u ah qoyska iyo saaxiibbada.

1SM: Waxay muujiyaan awoodaha faraxsanaanta. ("anaa sameeyay!")

1LL: Waxay Ku raaxaystaan abuurista dhaqdhaqaaqyo u gaar ah.

11d   

Waxay muujiyaan rabitaan ah inay wax ka bartaan mawduucyada iyo fikradaha kala duwan.

11d  

Waxay baaraan oo bartaan siyaabaha wax loo sameeyo.



Gobalka Washington Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)

GOLD®

| | | |
|---|---|--|
|  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD |
|  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD |
|  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD |

Ilmaha Socod baradka ah (16–36 billood):

1FC: Waxay muujiyaan inay doorbidayaan dadka waaweyn iyo kuwa la midka ah ee la yaqaan.

1FC: Waxay aoonsadaa doorarka qoyska dhexdiisa.

1FC/2SB: Waxay aa qaybgalaan dhaqamada qoyska, sida waxa qoysku sameeyo xilliga cashada.

1SC: Waxay ka fogaadaan daryeelaha koowaad marka ay joogaan meelo la yaqaan oo ka baxsan guriga.

1LL: Waxay si firfircoon u sahaminta deegaanka.


1LL: Waxay iskudayaan inay sameeyaan waxyaabaha ay jecel yihiin marka loo eego waxyaabaha aysan jeclayn.

2SB: Waxat billaan inay si habboon ula dhaqmaan xubinaha kamidka ah bulshooyinka kala duwan, sida qoyska, fasalka, deriska, bulshada caqiidada.

2SB: Waxat ku faraxaan inay arkaan saaxiibo iyo dad ay yaqaanaan. Waxay leeygiin saaxiib ay doorbidayaan.

11d 

Waxay baaraan oo bartaan siyaabaha wax loo sameeyo.

1c 

Waxay rabaan inay naftooda wax u qabtaan.

11a 

Waxay fiiro gaar ah siiyaan waxyaabaha ay arkaan iyo dhawaaqyada.


11d 

Waxay adeegsadaan dareenka si ay u sahamiyaan jawiga dhow.



Gobalka Washington Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)

GOLD®

| | | |
|---|---|--|
|  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD |
|  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD |
|  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD |

Ilmaha yaryar (0–18 billood):

1FC: Waxay raadsadaan daryeel bixiyeyaal lagu kalsoon yahay si ay u helaan raaxo iyo taageero.

1FC/4S: Waxay aqoonsadaan oo muujiyaan mudnaanta daryeel bixiyayaasha asaasiga ah marka loo eego dadka aysan aqoon. Way ooyaan marka daryeelaha uusan arkayn ama waxay ku dhegaan daryeelaha marka uu u dhow yahay qof aysan aqoon.

1SC: Waxay iskudayaan inay si kaligood ah wax qabtaan. Waxay muujiyaan farxad marka ay dhameeyaan hawl fudud.

1SC: Waxay au jawaabaan dhaqdhaqaaqa iyo/ama dhawaaqyada marka qof ku dhawaaqo magaca ilmaha.

1SC: Waxay muujiyaan inay dhibsanayaan marka ay sameynayaan wax aysan rabin; baro waxa ay jecel yihiin inay sameeyaan.

1SC: Gacanta ku taag si aad u muujiso waxyaabaha ay jecel yihiin.

1SC: Waxay doortaan waxyaabaha ay ku ciyaarayaan.

1LL: Waxay muujiyaan doorbidida alaabta carruurta ku ciyaarto iyo waxqabadyada qaarkood.

1LL/6K: Waxay muujiyaan xiisaha sahaminta, dareenka iyo fiirinta walxaha ku cusub ilmaha ayadoo la adeegsanaayo dareemo iyo dhaqdhaqaaqyo kaladuwan.

2IP/6SS: Waxay muujiyaan xiisaha dadka iyo carruurta kale ay u qabaan ayagoo daawanaya oo isku dayaya inay ku daydaan iyaga (sida u raacidda walaalka ka wayn agagaarka).

6A: Waxay muujiyaan xiisaha dhawaaqyada, codadka, dhawaaq, muusikada, midabada iyo qaababka.

1c 

Waxay rabaan inay naftooda wax u qabtaan.

11a 

Waxay fiiro gaar ah siiyaan waxyaabaha ay arkaan iyo dhawaaqyada.

11d 

Waxay adeegsadaan dareenka si ay u sahamiyaan jawiga dhow.

Bartilmaameedka Is Maareynta 1C: Waxay sameeyaan is baraarujin iyo fahamka saameynta banaanka, tusaale ahaan, dhaqanka, qoyska, dugsigi, iyo ilaha bulshada iyo taageerooyinka.

WAXBARASHADA DHEXE EE DHALLAANKA

Haddii aan helo caawimaada dadka waawayn, waxaan...

- Awoodaa inaan dejiyo yoolkayga gaarka ah.



- Awoodaa inaan aqoonsado dadka waawayn ee badqabka leh oon u arko inay bixinayaan ilo ama taageero ka baxsan qoyskayga.
- Awoodaa inaan oggaado sababta aan taageero oga dalbanaayo dadka kale.

| <p style="text-align: center;">Gobalka Washington</p> <p style="text-align: center;">Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)</p> | | <p>GOLD[®]</p> | | |
|---|---|---|--|--|
| | | <p>■ XILIGA DHALASHA ILLAA 1</p> <p>■ 1-2 SANO</p> <p>■ 2-3 SANO</p> | <p>■ DUGSIGA BIRIMADA 3</p> <p>■ DUGSIGA XANAANADA-K 4</p> <p>■ DUGSIGA XANAANADA</p> | <p>■ FASALKA 1AAD</p> <p>■ FASALKA 2AAD</p> <p>■ FASALKA 3AAD</p> |
| <p>Fasalka 3aad:</p> <p>Sii wad barashada xirfadaha ee isdaba joogaan. Si gaar ah wax u bar carruurta laga yaabo inaysan aqoon xirfadihii hore ama kuwa ka faa'iideysan doona tababar dheeraad ah. Si aad u hesho carruurta diyaarka u ah inay bartaan xirfadaha dheeraadka ah ee aaga, tixraac qaybta “Dugsiga dhexe ee Danbeeya” ee Heerarka OSPI SEL.</p> | <p>1c ■ W</p> <p>Waxay si sax ah u aqoonsadaan awoodaha iyo caqabadaha (is qiimeynta, is dhiirigelinta); waxay hormariyaan oo ka shaqeeyaan hadafyada shaqsiyeed.</p> <p>11c ■ ■ W</p> <p>Waxay xalliyaan dhibaatooyin baaxad leh iyagoo adeegsanaya xeelado kaladuwan; isku dayayna inay si madaxbannaan u xalliyaan dhibaatooyinka kahor intaysan caawimaad weydiisan dadka waaweyn ama asaagooda.</p> <p>11c ■ ■ W</p> <p>Waxay xalliyaan dhibaatooyin baaxad leh iyagoo adeegsanaya xeelado kaladuwan; isku dayayna inay si madaxbannaan u xalliyaan dhibaatooyinka kahor intaysan caawimaad weydiisan dadka waaweyn ama asaagooda.</p> <p>11b ■ W</p> <p>Waxay qorsheeyaan ayna dhameystiraan shaqooyinka ku saleysan fasalka iyo mashruucyada ayagoo caawimaad yar ka helaaya dadka waawayn.</p> <p>1c ■ ■ W</p> <p>Waxay sameeyaan xirfadaha si ay u gaaraan heerka la rabo ee guusha shaqsiyeed.</p> | | | |
| <p>Fasalka 2aad:</p> <p>1LL: Waxay sameeyaan ayna raacaan qorshooyin dhowr talaabo ah si ay u dhameystiraan shaqo.</p> | | | | |



Gobalka Washington Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)

GOLD®

| | | |
|---|---|--|
|  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD |
|  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD |
|  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD |

Fasalka 1aad:

Sii wad barashada xirfadaha ee isdaba joogaan. Si gaar ah wax u bar carruurta laga yaabo inaysan aqoon xirfadihii hore ama kuwa ka faa'iideysan doona tababar dheeraad ah. Si aad u hesho carruurta diyaarka u ah inay bartaan xirfadaha dheeraadka ah ee aaggaan, tixraac qiimeyna xigta ee fasalka.

1c   

Waxay sameeyaan xirfadaha si ay u gaaraan heerka la rabo ee guusha shaqsiyeed.

11b   

Waxay qorsheeyaan ayna sameeyaan yoolkooda illaa ay ka gaarayaan.

2a   

Waxay ilo iyo waxyaabaha ay doonayaan ka dalbadaan dadka waawayn ee ay ku kalsoon yihiin.

Dugsiga Xanaanada:

1SM/1LL: Waxay sameeyaan ayna raacaan, mararka qaar, qorshooyin dhowr talaabo ah si ay u dhameystiraan shaqo.

2IPO: Waxay aqbalaan dad cusub oo ay aaminsan yihiin (tusaale, macalinka, darawalka baska).

6K: Waxay sida ugu fiican wax ugu bartaan marka si firfircoon loo baaro alaabta la taaban karo (baloogyada, rinjiga, iwm). Waxay sameeyaan qorshayaal ku aadan sahamintaan. Waxay ka hadlaan waxay ka barten hawsha oo ay jeclaan lahaayeen inay tan xigta qabtaan.

6SS: Waxay yaqaanaan dadka sharciyada ka fuliya dugsiga iyo bulshada dhexdeeda sida (maamulaha, macallinka, ilaalada isgoysyada, wadayaasha basaska, dab damiska, iwm.).

11b   

Waxay qorsheeyaan ayna sameeyaan yoolkooda illaa ay ka gaarayaan.

2a   

Waxay ilo iyo waxyaabaha ay doonayaan ka dalbadaan dadka waawayn ee ay ku kalsoon yihiin.

11b   

Waxay qorsheeyaan oo daba galaan hawlo kala duwan oo leh loolan adag.



Gobalka Washington Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)

GOLD®

| | | |
|---|---|--|
|  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD |
|  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD |
|  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD |

Dugsiga Birimada (4-5):

1SC: Waxay doortaan waxqabadyo ay kaligood sameeyaan ama ay sameeyaan dadka kale (sida xujooyinka, rinjiyeynta, iwm).

2IA: Waxay daryeel bixiye ka raadsadaan taageerada dareenka.

2SB: Waxay dhegaystaan waxa ay carruurta kale rabaan waxayna sameeyaan qorshayaal tixgeliya rabitaannadaas.

2IPO: Waxay sameeyaan oo raacaan qorshayaasha ciyaaraha carruurta kale.

2PSCR: Waxay caawimaad ka dalbadaan ilmaha kale ama qof wayn si ay u xaliyaan dhibaataada.

4S: Waxay aqoonsadaan dadka waawayn ee la aamini karo oo caawin kara xaaladaha halista ah.

6K: Waxay dadka waawayn waydiiyaan su'aalo si ay u helaan macluumaad (sida ku habboon dhaqankaqoyska).

6K: Waxay awoodaan inay sharaxaan waxay sameeyeen iyo sababta ay u sameeyeen, oo ay kujiraan wixii isbaddel ah oo au ku sameeyeen qorshayaashooda.

2a 

Waxay ilo iyo waxyaabaha ay doonayaan ka dalbadaan dadka waawayn ee ay ku kalsoon yihiin.

11b 

Waxay qorsheeyaan oo daba galaan hawlo kala duwan oo leh loolan adag.

1c 

Waxay muujiyaan kalsooni si loo daboolo baahiyaha gaarka ah.

Dugsiga Birimada (3-4):

1FC: Xusuusnoow dadka muhiimka u ah noloshu ilmaha.

1 SC: Waxay yaqaanaan naftooda oo qayb ka ah qoyska, kooxda ruuxiga ah, dhaqanka, bulshada, iyo/ama koox kale oo qoysku ka tirsan yahay.

1SM: Waxay awoodaan inay aqoonsadaan marka arrin ay adag tahay in la sameeyo.

1LL: Waxay Ku raaxaystaan abuurista dhaqdhaqaaqyo u gaar ah.

2IA: Waxay ka fogaadaan dadka waaweyn ee muhiimka ah, mararka qaarkoodna waxay ku tiirsan yihiin qof wayn si ay u dareemaan ammaan. Waxay cadaadiska ay dareemayaan ku baabi'iyaan qosol, ilin, gariir, hadal, ama hamaansasho.

2IA: Waxay muujiyaan kalgacalka ay u qabaan dadka waaweyn ee muhiimka ah.

6K: Waxay eegaan sawirka khibradahii hore si ay u doortaan falalka hadda jira.

6K: Waxay sameeyaan qorshayaal si ay wax u qabtaan. Waxaa laga yabaa inay raacaan ama aysan raacin.

1c 

Waxay muujiyaan kalsooni si loo daboolo baahiyaha gaarka ah.

2a 

Waxay u dulqaataan kala taga ayagoon dareemin walbahaar waxayna la hawlgalaan dadka waaweyn ee lagu kalsoon yahay.

11c 

Waxay fiiriyaan oo ku daydaan sida dadka kale u xalliyaan dhibaatooyinka; waxayna xal waydiistaan oo adeegsadaan.

11b 

Waxay sameeyaan waxqabad marar badan ilaa ay ku guulaystaan.



Gobalka Washington Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)

GOLD®

| | | |
|---|---|--|
|  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD |
|  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD |
|  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD |

Ilmaha Socod baradka ah (16–36 billood):

1FC: Waxay xiriir la sameeyaan daryeelayaasha ama qoyska aan ahayn waalidka ama daryeelaha koowaad.

1FC: Waxay muujiyaan inay doorbidayaan dadka waaweyn iyo kuwa la midka ah ee la yaqaan.

1FC: Waxay ku raaxaystaan meelo kala duwan marka ay la joogaan dadka waaweyn ee ay yaqaanaan (sida guriga, baabuurka, dukaanka ama goobta ciyaarta).

1FC: Waxay muujiyaan taxaddar ama cabsi marak ay arkaan dad aysan aqoon.

1SC: Waxau sameeyaan xulashooyin (sida dharka ay xiranayaan) waxayna soo qaataan buugaagta ay jecel yihiin, alaabta carruurta ku ciyaarto iyo waxqabadyada.

1SC: Waxay ka fogaadaan daryeelaha koowaad marka ay joogaan meelo la yaqaan oo ka baxsan guriga.

1SC: Waxay raadsadaan deganaanta dadka waaweyn iyagoo muhiim u ah marka ay ku jiraan xaalado cusub ama aan raaxo lahayn, ama marka ay gargaarka u baahan yihiin, ama dareemayaan dareen xoog leh.

1LL: Waxay isku dayaan siyaabo cusub oo wax loo sameeyo. Waxay eegaan saamaynta ficilladaadu ku leeyihiin walxaha iyo dadka.

1LL/6K: Waxay ku adkaystaan qaar kamid ah waxa ay rabaan. Waxau doortaan nashaado waxayna sameeyaan muddo dheer.

1LL/6K: Waxay dalbadaan caawimaad marka ay u baahdaan.

2IA: Waxay bilaabaan isdhexgalka waxayna la ciyaaraan dadka waaweyn.

2IA: Waxay feejignaan ka dalbadaan dadka waawayn.

4DLS: Waxay doonayaan inay is daryeelaan.

1c 

Waxay muujiyaan kalsooni si loo daboolo baahiyaha gaarka ah.

2a 

Waxay u dulqaataan kala taga ayagoon dareemin walbahaar waxayna la hawlgalaan dadka waaweyn ee lagu kalsoon yahay.

11c 

Waxay fiiriyaan oo ku daydaan sida dadka kale u xalliyaan dhibaatooyinka; waxayna xal waydiistaan oo adeegsadaan.

11b 

Waxay sameeyaan waxqabad marar badan ilaa ay ku guulaystaan.

1c 

Waxay rabaan inay naftooda wax u qabtaan.

2a 

Waxay u adeegsadaan dadka waaweyn ee ay aaminsan yihiin saldhig sugan oo ay ku bartaan adduunka.

11b 

Waxay ku celceliyaan falalka si ay u helaan natiijooyin la mid ah.

11c 

Waxay ka jawaabaan dhibaatooyinka; waxayna iskudayaan inay gaaraan hadaf gaar ah.



Gobalka Washington Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)

GOLD®

| | | |
|---|---|--|
|  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD |
|  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD |
|  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD |

Ilmaha yaryar (0–18 billood):

1FC/4S: Waxay aqoonsadaan oo muujiyaan mudnaanta daryeel bixiyayaasha asaasiga ah marka loo eego dadka aysan aqoon. Way ooyaan marka daryeelaha aysan arkin, ama waxay ku dhegaan daryeelaha ayagoo muujinaya cabsi marka dadka aysan aqoon ay u dhow yihiin.

1FC: Waxay raadsadaan daryeel bixiyeyaal lagu kalsoon yahay si ay u helaan raaxo iyo taageero.

1SC: Waxay ku celiyaan ficil si ay u helaan saamayn dheeraad ah.

1SC: Waxay doortaan waxyaabaha ay ku ciyaarayaan.

1SC: Waxay iskudayaan inay si kaligood ah wax qabtaan. Waxay muujiyaan farxad marka ay dhameeyaan hawl fudud.

1SM: Waxay u isticmaalaan qofka wayn oo ay aadka kugu kalsoon yihiin sida inuu yahay saldhig sugan oo ay ku bartaan aduunkooda.

1SM/4S: Waxay raadiyaanKa jawaabtadaryeelaha xaaladaha ee aan la hubin, marka ay tijaabinayaan wax cusub, ama kahor intaan la bilaabin dabecad aan ammaan ahayn.

1SM/6k: Way ooyaan, waxayna sameeyaan dhawaaqyo, kelmado, dhaqdhaqaaqa wajiga, ama dhaqdhaqaaqa jirka si ay daryeel bixiyaha ugu sheegaan baahihooda ayna u helaan caawimaad, fiiro gaar ah ama raaxo.

1LL: Waxay bilaabaan isdhexgalka dadka waaweyn iyo carruurta ay yaqaanaan (sida dhoolla caddaynta ama dhawaaqyada).

2PSCR: Waxay aqbalaan dadka waawayn ee soo galaya arrinta marka ay jiraan muran ku saabsan alaabta carruurta ku ciyaarto iyo ciyaarta.

11b 

Waxay sameeyaan waxqabad marar badan ilaa ay ku guulaystaan.

1c 

Waxay rabaan inay naftooda wax u qabtaan.

2a 

Waxay u adeegsadaan dadka waaweyn ee ay aaminsan yihiin saldhig sugan oo ay ku bartaan adduunka.

11b 

Waxay ku celceliyaan falalka si ay u helaan natiijooyin la mid ah.

11c 

Waxay ka jawaabaan dhibaatooyinka; waxayna iskudayaan inay gaaraan hadaf gaar ah.

2a 

Waxay muujiyaan hilloow sax ah oo ay la yeelanayaan hal ama in kasi badan oo ah dadka waawayn.





Heerka 2 aad: Is Maareynta

UJEEDOYINKA MUHIIMKA AH:

Shaqsiyaadku waxay awood u leeyihiin inay maareeyaan shucuurtooda, fikirkooda, iyo dabecadooda iyo inay yeeshaan xirfadaha lagu xaliyo dhibaatooyinka

SABAB: Awooda xakameynta shucuurta, fikirka iyo dabecadaha waxay ku xiran tahay aqoonta iyo wacyi gelinta carruurta iyo awooda ay u leeyihiin inay shucuurtooda iyo shacuurta dadka kale. Badanaa, carruurta yaryar waxay si joogto ah u bartaan xirfadaha wacyi gelinta iyo is xakameynta. Sida meelaha kale ee waxbarashada iyo hormarka, awooda lagu xakamayn karo caadifadaha, ku lug yeelashada go'aan qaadashada mas'uuliyadda leh, iyo fahamka in ficilladu leeyihiin cawaaqib xumo, waa in dadka waawayn si ula kac ah u taageeraa gaarka dadka tusaaleynaayada xirfadahaas. Marka carruurta dareemaan ammaan oo ay ogaadaan in baahidooda la dabooli doono, waxay markaa isku aamini karaan naftooda iyo habraacyada marka ay baranayaan inay dib u dhigaan qanacsanaanta, waxayna s habboon u maareeyaan dareenkooda, iyo inay galaan xeelado wax ku ool ah oo xallinta dhibaatooyinka la xariira.

SIDEE: Si aad kor ugu qaado is xakameynta carruurta, waxay u baahan yihiin fursado ay ku bartaan shucuurtooda iyo sidoo kale kuwa dadka kale. Fahanka baahiyaha qof kalewaa wax aad muhiim u ah marka carruurta dhisayaan xirfadahooda ku aadan is xakameynta. Waqti ku qaado inaad labadiinuba qirataan sida uu ilmuhu dareemaayo una sharraxo waxyaabaha qofkale. Sidaas in la sameeyo waxay ka caawisaa carruurta inay dareemaan qiimayn iyo in la fahmay ayagoo weliba tixgelinaaya macluumaad dheeraad ah.

Waa wax iska caadi ah in carruurta dareemaan dareen adag iyo balaaran, kuwaas oo ayaga iyo annagaba ku adkaan kara. Dadka qaangaarka ah ee niyadda wanaagsan leh ayaa mararka qaar u dhaqma qaabab ay carruurta oga ilaalinayaan dareennadaas adag, ayagoo markaa xaddidaaya fursadaha ay u leeyihiin inay ku tababartaan nidaaminta dareenkooda. Inkastoo ka fogaanshaha khilaafku gebi ahaanba shaqayn karo muddo aan aad u badneyn, mustaqbalka fog, carruurta waxay waayaan fursado ay ku dhistaan xirfaddooda iyo kalsoonidooda wax ka-qabashada arrimaha la xariira niyad jabka waxaana laga yaabaa inay u baahdaan taageero ka badan kuwa asaagood ah helaan markay weynaadaan.

Taas adligeed, dadka waawayn waxay muujin karaan naxariis iyo dabacsanaan marka carruurta dareemaan niyad jab, walbahaar, dhaawac, xanaaq, ama marka ay aad u farxaan. Dadka waawayni waxay kale oo ka caawin karaan carruurta inay hagaajiyaan dareenkooda iyo ficilladooda ayagoo iftiiminaya waxay samayn karaan, halkii ay xoogga saari lahaayeen waxay samayn kariwaayeen. Markay dadka waawayn caawiyaan oo taageeraan carruurta si ay u socodsiiyaan dareenkooda iyo shucuurtooda, dadka waawayn waxay sii wadi karaan inay hagaan waxbarashadooda ayagoo weydiisanaya inay ka fikiraan waaya aragnimadii hore, arrimaha ay ka barten natiijada, iyo inay qorsheeyaan tallaabooyinka xiga, oo ku saleysan rajadooda iyo hadafyadooda.



Qaababka loo Caawiyo

Waalid ahaan, daryeele ama macalin ahaan, fadlan:

- Dhis xiriiryo iyo hilloow dhab ah oo aad la yeelanayso ilmo kasta adigoo baranaya ayaga iyo danahooda.
- Hubi in baahiyaha aasaasiga ah la buuxiyo, kuwa la xariira cuntada, cabitaanka, nasashada iyo sidoo kale saadaalinta, hababka iyo isdhexgalka badbaadada iyo jadwalada.
- Hubi inay haystaan sahay ku filan, agab iyo waxqabadyada la doorbiday ee goobaha kooxda ka jira.
- Xooji koritaanka habboon, iyo filashooyinka wanaagsan.
- La shaqee carruurta iyo qoysaska si ay u qiimeeyaan filashooyinka una hubiyaan inay yihiin kuwo cad oo macquul ah, oo ku saleysan da'da ilmaha, kartida, waaya aragnimada, danaha iyo aqoonsiga.
- Ku dhiirrigeli hawlaha/alaabta is dejinta ku habboon.
- Akhri sheekooyinka oo ka qaybgal wadahadal ku saabsan xallinta dhibaatooyinka bulshada.
- Muuji damqasho iyo faham kuna muuji xagga codkaaga iyo muuqaalkaaga.
- Kudayo carruurta adiga oo calaamadinaya shucuurtaada sheegayana magaca aragtiyo kale ama tixgelino, ku salaysan xaaladda.
- Ka caawi carruurta inay gartaan hadafyadooda kuna dhiirrigeli inay kaalin firfircoon ka qaataan la kulankooda.
- Caawi carruurta si ay u ogaadaan arrimaha laga filayo adiga oo siiya macluumaad hormarineed iyo taageero ku habboon inta lagu guda jiro waqtiga kala gurka.
- *Ka caawi carruurta inay bartaan sugitaanka, wax wadaagista iyo leexashada ayagoo adeegsanaay saacad.*
- Ka caawi carruurta inay nidaamiyaan ayadoo siinaya xulashooyin xaddidan iyo adeegsiga marka *hore*, kadibna luuqada. Tusaale ahaan, “Marka koowaad nadiifi aaga baloogyada, kadibna waxaan aadi karnaa banaanka.”
- Filo inaad isku dhacdaan oo diyaar u noqo in aad taageero siiso marka ay carruurta ku hawlan yihiin xeeladaha xalinta caqabadaha iyo in laga hortago in arrimuhu sii xumaadaan.
- Qaabee xirfadaha xallinta caqabadaha habboon adigoo weydiisanaya talooyinka carruurta, bixiya xalka suurtagalka ah, iyo weydiinayana jawaab celinta illaa heshiis laga gaaro, ama illaa adiga, sida qof wayn, ay tahay inaad go'aan ka gaarto.
- Dhibaatooyinka xalliya isku dhacyada dadka isku faca ah marka dhammaan carruurta xakameeyaan.
- Ciyaar ciyaaro ay carruurta fursad u helayaan inay sameeyaan is xakameynta oo ayna ku raaxaystaan. (Simon wuxuu leeyahay, Layrka gaduudan/Layrka Cagaaran, iwm.)

Milicsiga iyo Hannaanka

Hab sidee ah ayaad adeegsataa marka aad dooneyso inaad xakameyso dareenkaaga gaarka ah?

Ka fakar waqti uu qof ku tusay naxariis. Waqtigaas saameyn sidee ah ayay kugu yeesheen?

Sidee dareentaa marka aad filayso inaad sameyso arrin, laakiin tilmaamuhu aysan ahayn arrin cad ood fahantay?

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida Loo Maareeyo naftaada, fadlan booqo:

[DEY: Samee Hannaanka Xakameynta Baahiyaha ee Maslow ee ku aadan Sinnaanta Dugsiga](#)

[Edutopia: Sida loo baro Is xakameynta](#)

[Xarunta Harvard ee Hormarinta Ilmaha: Hawlaha Lagu xakameeyo Nafta](#)



Heerka 2 aad: Tilmaamaha Is Maareynta

Shaqsiyaadku waxay awood u leeyihiin inay maareeyaan shucuurtooda, fikirkooda, iyo dabeecadooda

Bartilmaameedka Tilmaamaha Is Maareynta 2A: *Wuxuu muujiyaa xirfadaha shaqsiyaadka ee ku aadan shucuurta, fikirka, dareenka, iyo walbahaarka ayadoo loo mareeyo siyaabo wanaagsan.*

WAXBARASHADA DHEXE EE DHALLAANKA

Haddii aan helo caawimaada dadka waawayn, waxaan...










- Fahmi karaa in ficiladaydu yeelan karaan cawaaqiib xumo.
- Aqoonsan karaa istaraatiijiyadaha iga caawinaaya inaan xakameeyo naftayda waxaana dalban karaa caawimaad dheeraad ah haddii aan u baahanahay.
- Muujiin karaa inaan fahmaayo yoolalka iyo hab raacyada fasalka iyo sababta ay u jiraan.

| <p>Gobalka Washington Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)</p> | <p><i>GOLD</i>[®]</p> <table border="1"><tr><td> XILIGA DHALASHA ILLAA 1</td><td> DUGSIGA BIRIMADA 3</td><td> FASALKA 1AAD</td></tr><tr><td> 1-2 SANO</td><td> DUGSIGA XANAANADA-K 4</td><td> FASALKA 2AAD</td></tr><tr><td> 2-3 SANO</td><td> DUGSIGA XANAANADA</td><td> FASALKA 3AAD</td></tr></table> | XILIGA DHALASHA ILLAA 1 | DUGSIGA BIRIMADA 3 | FASALKA 1AAD | 1-2 SANO | DUGSIGA XANAANADA-K 4 | FASALKA 2AAD | 2-3 SANO | DUGSIGA XANAANADA | FASALKA 3AAD |
|---|---|-------------------------|--------------------|--------------|----------|-----------------------|--------------|----------|-------------------|--------------|
| XILIGA DHALASHA ILLAA 1 | DUGSIGA BIRIMADA 3 | FASALKA 1AAD | | | | | | | | |
| 1-2 SANO | DUGSIGA XANAANADA-K 4 | FASALKA 2AAD | | | | | | | | |
| 2-3 SANO | DUGSIGA XANAANADA | FASALKA 3AAD | | | | | | | | |
| <p>Fasalka 3aad: 1SM: Baro oo ogsoonow istaraatiijiyada lagu maareeyo shucuurta kaladuwan, sida isticmaalida habka lagu xakameeyo xanaaqa marka aad xanaaqsan tahay.</p> | <p>1a Waxay muujiyaan dulqaad leh xaddidaad shaqsiyeed; waxayna xakameeyaan dareenka ku salaysan sida ay u saamayn doonaan dadka kale.</p> <p>1b Waxay muujiyaan fahmida “sharciga wayn” ee la xariira fikirka iyo badqabka, xanariista, xushmada, iyo daryeelida shey'yada iyo agabyada yaala bii'ada.</p> <p>1a Waxay maareeyaan shucuurta ayagoo isticmaalaya istaraatiijiyado la garanaayo.</p> | | | | | | | | | |



Gobalka Washington

Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)

| | | |
|---|---|--|
|  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD |
|  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD |
|  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD |

Fasalka 2aad:

1SM: Waxay fahmaan oo sharaxaan saamaynta shucuurta kaladuwan ku leedahay dadka kale. Tusaale ahaan, faraxsanaanta ayaa laga yaabaa inay dadka kale ka caawiso inay dareemaan farxad, halka walbahaarkuna dadka kale ka dhigi karto inay dareemaan murugo.

4NH: Waxay bilaabaan inay fahmaan cawaaqibka dabeecadaha caafimaadka leh iyo xulashooyinka, sida siyaabaha looga hortago xanuunada.

1a   

Waxay maareeyaan shucuurta ayagoo isticmaalaya istaraatiijiyado la garanaayo.

1b   

Waxay fahmaan oo sharxaan sababaha sharciyada.

Fasalka 1aad:

1SM: Waxay dejiyaan shucuuraha adad waxayna iska ilaaliyaan arrimaha keena xanaaqa.

1SM: Waxay sharaxan siyaabo aad ula qabsan karto oo u maareyn karto walaaca. Tusaale ahaan, haddii saaxiibku uusanrabin inuu mar dambe ciyaaro (walbahaar), casuun qof kale si uu kuula ciyaaro (la qabsado).

2IPO: Waxay ka fikiraa sida dhaqankoodu u saameeyo dadka kale.

4S: Waxay fahmaan in xeerarka ciyaarta qaarkood loogu talagalay badbaadada.

1b   

Waxay fahmaan oo sharxaan sababaha sharciyada.

1a   

Waxay xakameeyaan shucuurta xoogan oo ah hab habboon inta badan.

Dugsiga Xanaanada:

1SM: Waxay bilaabaan inay gartaan sida falalkoodu u saameeyo dadka kale.

1SM: Waxay iska diidaan arrimaha keena xanaaqa waxayna doortaan dabeecad habboon oo leh jihayn yar oo wayn.

1SM: Waxay la qabsadaan bii'ada cusub ayagoo oo u dhaqmaya muujinayana shucuurta siyaabaha la filayo.

1SM: Waxay sameeyaan is-badel ficillada ku aadan si ay ula kulmaan waxa laga filayo goobaha iyo xaaladaha kala duwan si ay ugu dabaqaan dabeecadaha la oggool yahay xaalado cusub laakiin la mid ah, sida kabaha oo ay iska siibaan markay joogaan guriga, uga tagaan dugsiga, iyo xirtaan kabaha roobka marka roob jiro.

2SB: Waxay aqbalaan cawaaqiib xumada ficilladooda.

4S: Waxay awoodaan inay sharaxaan sababaha xeerarka badbaadada.

1a   

Waxay xakameeyaan shucuurta xoogan oo ah hab habboon inta badan.

1b  

Waxay adeegsadaan xeerarka aasaasiga ah iyo xaaladaha cusub ee la midka ah.

1a    

Waxay awoodaan inay si ka duwan u eegaan xaaladda ama dib u dhigaan qanacsanaanta.

1b    

Waxay maamulaan xeerarka fasalka, hab socodyada, iyo kala guurka ayagoo marmar sameynaaya xusuusino.



Gobalka Washington Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)

GOLD®

| | | |
|---|---|--|
|  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD |
|  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD |
|  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD |

Dugsiga Birimada (4-5):

1SM: Waxay fishaan cawaaqiib xumada dabeecadooda. Markay helaan caawinaad, waxay tixgeliyaan suurtagalnimada iyo waxayna qorsheeyaan habab wax ku ool ah oo ku aadan dhibaatooyinka.

1SM: Waxay bilaabaan inay ku raaxaysataan cayaaraha ay tahay inuu ilmuhu baddelo dabeecada isagoo ka jawaabaya tilmaamaha badelida.

2IA: Waxay fahmaan in dadka waawayni ay rabaan in ilmuhu sameeyo wax ka duwan waxa ay rabaan inay sameeyaan.

2SB: Waxay habdhaqanka ku hagaajiyaan goobo kala duwan (sida adeegsiga codka dibedda ama codka gudaha), mararka qaarkood xusuusiyayaal.

2SB: Waxay awoodaan inay ka fikiraan dabeecadda, inay noqdaan qof iskaashi leh oo aan dhib lahayn. Waxay awoodana inay ka hadlaan siyaabaha ugu wanaagsan ee wax loo qaban karo.

2SB: Waxay sugaan tookadooda ayagoon xanaaqin ama qabsan. Waxaa laga yabaa inay lumiyaan xiisaha shayga ama hawsha kahor intaan la gaarin tookadooda.

2PSCR: Waxay caawimaad ka dalbadaan ilmaha kale ama qof wayn si ay u xaliyaan dhibaataada.

4S: Waxay raacaan xeerarka badbaadada ee gudaha iyo dibaddaba.

6K: Waxay qiyaasaan waxyaabaha ay sameyn doonaa maalintii marka uu jiro jadwal joogto ah.

6K: Waxay iskudayaan si ay u fahmaan sababta iyo saameynta (“haddii aan sameeyo arrintaan, maxay arrintaas u dhacdaa?”).

6A: Waxay muujiyaan dareennada ayadoo loo maraayo dhaqdhaqaaq iyo qoob ka ciyaar muusikada iyo qaababka kala duwan.

1a    

Waxay awoodaan inay si ka duwan u eegaan xaaladda ama dib u dhigaan qanacsanaanta.

1b    

Waxay maamulaan xeerarka fasalka, hab socodyada, iyo kala guurka ayagoo marmar sameynaaya xusuusino.



Gobalka Washington Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)

GOLD®

| | | |
|---|---|--|
|  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD |
|  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD |
|  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD |

Dugsiga Birimada (3-4):

1SM: Waxaa ku adkaata inay ku shaqeeyaan cadaadis, gaajo, bakhdin, niyad jab, xanaaq, iw, taasoo keenta dabeecad waxyeelo leh, waxyeello iyo xanaaq leh.

1SM: Siideynta ama dib u hagaajinta xiisadaha shucuureed—sida oohinta, qosolka, gariirka, hamaansasho, calaamad, bood, socod—noqosho dabacsan iyo wadashaqayn kadib.

1SM: Waxay aqoonsan karaan xeerarka fudud oo ka filo kuwa kale inay raacaan.

1SM: Waxay saadaalin karaan waxa soo socda maalinta xigga, marka ay jirto jadwal joogto ah.

1SM: Mararka qaarkood waxay diidaan daawaynta hadda haddii daaweyn ka fiican la heli doono hadhow.

1SM: Waxay xasuustaan ayna gacan ka geystaan hawl maalmeedka caadiga ah, sida gelitaanka kursiga baabuurka, iyo badelka hal hawl oo kale, oo leh xusuusinta marmar ah.

1SM: Waxay maareeyaan isbedellada joogtada ah waxayna bartaan dabeecado cusub oo leh wax qabad yar.

2SB: Waxay ka jawaabaan tilmaamaha dadka waaweyn ee ku saabsan iska fogeynta alaabta ama ka taxaddarka.

2SB: Waxay fiiriyaan boosaska shey'yada waxayna gacan ka geystaan in meel la dhigto (sida alaabta carruurto ku ciyaarto, waxayna ku ridaan weelkooda saxanka dhaqidda).

2PSCR: Waxay sugaan tookadaan.

2PSCR: Waxay aqoonsadaan siyaabaha lagu badeli karo dabeecadda si looga jawaaborabitaanka ama baahiyaha qof kale. Waxay xasuusnaadaan oo raacaan heshiiska ayagoon helin xusuusin dheeraad ah, mararka qaarkood.

4S: Waxay bilaabaan inay bartaan xeerarka badbaadada ee dhaqdhaqaaqyada maalinlaha ahee ilmaha.



6K: Waxay sawiraan khibradoodii hore si ay u doortaan falalka hadda jira.

1a    

Waxay awoodaan inay si ka duwan u eegaan xaaladda ama dib u dhigaan qanacsanaanta.

1b    

Waxay maamulaan xeerarka fasalka, hab socodyada, iyo kala guurka ayagoo marmar sameynaaya xusuusino.

1a    

Wuxuu isku raaxeeyaa naftiisa isagoo raadinaya shay ama qof gaar ah.

1b    

Waxay dadka waawayn ka aqbaan tilmaamaha.



Gobalka Washington

Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)

GOLD®

| | | |
|---|---|--|
|  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD |
|  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD |
|  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD |

Ilmaha Socod baradka ah (16–36 billood):

1FC/1SM/2SB/4DLS/6K/6SS: Waxay xasuustaan, raacaan, dib u xasuustaan amarka, waxayna ka qaybgalaan caadooyinka fudud, oo ay ku jiraan hab dhaqanka qoyska, hurdada, iyo caadooyinka fasalka ee nadiifiya waxyaabaha.

1SC: Waxay raadsadaan deganaanta dadka waaweyn iyagoo muhiim u ah marka ay ku jiraan xaalado cusub ama aan raaxo lahayn, ama marka ay gargaarka u baahan yihiin, ama dareemayaan dareen xoog leh.

1SM: Waxay dadka kale u tilmaamaan inay raacaan talaabooyinka sharciyada iyo jadwalada, xataa markay raaci waayaan.

1SM/2SB: Waxay xanaaq iyo dhibaato kala kulmaan waxbarashada dabeecadaha cusub marka hab raacyada aan la raacin ama aan la badelin.

1SM: Waxay si fiican oga jawaabaan tilmaamaha dadka waaweyn, inta badan. Waxay xadidaan imtixaanka waxayna iskudayaan inay si madaxbanaan u sameeyaan.

1SM: Waxay joojiyaan nashaadaadka ama waxay iska ilaaliyaan inay wax sameeyaan haddii lagu amro.

1SM: Waxay muujiyaan dareen xoog leh marka ay xanaaqsan yihiin.

1SM: Waxay sameeyaan waxyaalaha lagu amro inuu cunugu sameeyo.

1LL: Waxay raadsaan ayna dalbadaan caawimaad marka ay la kulmaan dhibaato.

1LL: Waxay badelaan dabeecada ayagoo ku saleynaaya wuxuu ilmuhu horey u bartay.

2SB: Waxay bilaabaan inay si habboon ugu dhaqmaan xubin ahaan ama bulshooyin kala duwan, sida qoyska, fasalka, deriska, bulshada dhaqanka.

2PSCR: Waxaa ku adkaata inay sugaan tookadooda. Waxay isticmaalaan caawimaada dadka waawayn si ay ula wadaagaan ayna sameeyaan tookadooda.

4S: Waxay aqoonsadaan xeerarka badbaadada, laakiin had iyo jeer ma raacaan.

5SL: Waxay dhibtaadaan haddii tilmaamo iskumar la siiyo.

6K: Waxay tijaabiyaan saamaynta ficiladooda ku leeyihiin waxyaabaha iyo dadka.

6K: Waxay Ogsoon yihiin in ciyaarista waxyaabaha ay jecel yihiin ama la mamnuucay ayaa soo jiidan doona dareenka dadka waaweyn.

6K/6SS: Waxay isku xiraan waayo aragnimada cusub iyo khibridaha hore waxayna qaataan talaabo ku salaysan waayo aragnimadii hore.

6K: Waxay koobi gareysaa sida dadka kale u xaliyaan dhibaatooyinka.

6K: Waxay dalbadaan caawimaad marka ay u baahdaan.

6A: Waxay isticmaalaan qalabyo kala duwan si ay u muujiyaan naftooda, sida rinjiga, qalimaanta iyo qalabka muusikada.

1a 

Wuxuu isku raaxeeyaa naftiisa isagoo raadinaya shay ama qof gaar ah.

1b 

Waxay dadka waawayn ka aqbaan tilmaamaha.

1a 

Waxay adeegsadaan taageerada dadka waawayn si ay naftooda u dejiyaan.

1b 

Waxay ka jawaabaan tilmaamaha daryeelaha ee ku saabsan sida loola dhaqmo dadka si habboon.



Ilmaha yaryar (0–18 billood):

1FC/1SM: Waxay sameeyaan oohin, qaylo, gariir, hamaansasho iyo qosol si ay u sii daayaan cadaadiska ay daremayaan, una muujiyaan ama iskugu dejiyaan dareenno kala duwan.

1SC/6S: Waxay ku celiyaan ficilka si ay u ogaadaan sababta iyo saamaynta (sida inay ku dhex ruxaystaan sariirta si ay u ruxaan moobeelka kor ka laalaada, ayagoo dhoola cadeynaya oo la kaashanaya si daryeel bixiyaha oga dhoola caddeyaan, siina daayaan alaabta lagu ciyaaro ee soo noqnoqda).

1SC: Waxay wajiga ka muujiyaan farxad (wejiga “ayaa iftiima”) waxayna soo bandhigaan dabeecadooda.

1SM/1LL/6K: Waxay sameeyaan oohin, waxayna sameeyaan dhawaaqyo, ayagoo adeegsanaaya erayo, dhaqdhaqaaqa wajiga, tilmaamid, dhaqaajinaya jirka si ay u ogeysiiyaan daryeel bixiyaha baahida ay u qabaan caawimaad, feejignaan, raaxo ama isbadel xaga dhaqdhaqaaqa ah.

Ilmaha Socod baradka ah (16–36 billood):

1FC: Waxay ku raaxeystaan sheekada, heesaha iyo gabayada ku saabsan dadka kaladuwan iyo dhaqamada kaladuwan.

2SB: Waxay la ciyaaraan carruurta; waxay oggaadaan waxyaabaha isku midka ah iyo waxyaabaha aan isku midka ahayn.

2SB: Waxay tookadooda ka qaataan ciyaaraha bulshada.

2IPO: Waxay bilaabaan inay ilmaha kale ku daraan ciyaarta, sida ciyaarta jeeska.

2PSCR: Waxay si habboon oga jawaabaan (inta badan) marka ilmo kale muujiyo rabitaankiisa, sida in lala eego buug.


6SS: Waxay fahmaan doorarka kaladuwan ee bulshada.

3a   

Waxay si wanaagsan ugu jawaabaan dadka kale.

Ilmaha yaryar (0–18 billood):

6SS: Waxay muujiyaan xiisaha ay u qabaan dadka.

3a   

Waxay si wanaagsan ugu jawaabaan dadka kale.



Halbeegyada Ka qaybgalka Bulshada 6C: Waxay si fiican oga qaybqaataan hawlaha iskuulka, shaqada, iyo bulshada.

WAXBARASHADA DHEXE EE DHALLAANKA

Haddii aan helo caawimaada dadka waawayn, waxaan...








- Aqoonsan karaa oo aan qaban karaa hawlaha wax ku biirinaya hawlaha fasalkayga—tusaale ahaan, raacitaanka xeerar la dejiyay, tookaysiga, ka fiirsashada dadka kale.
- Aqoonsan karaa xaquuqaha iyo waajibaadyada bulshada.
- Aqoonsan karaa muhiimada ay leedahay daryeelka bii'ada dabiiciga ah ee aan ku nool nahay.
- Aqoonsan karaa sida dadku u isticmaalaan warbaahinta bulshada oo ah habka la iskula xariiro iyo sida ay oga duwan tahay qaababka kale ee xiriirka.

| <p style="text-align: center;">Gobalka Washington Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)</p> | <p style="text-align: right;"><i>GOLD</i>[®]</p> <table border="0" style="width: 100%; text-align: center;"> <tr> <td style="width: 33%;">■ XILIGA DHALASHA ILLAA 1</td> <td style="width: 33%;">■ DUGSIGA BIRIMADA 3</td> <td style="width: 33%;">■ FASALKA 1AAD</td> </tr> <tr> <td>■ 1-2 SANO</td> <td>■ DUGSIGA XANAANADA-K 4</td> <td>■ FASALKA 2AAD</td> </tr> <tr> <td>■ 2-3 SANO</td> <td>■ DUGSIGA XANAANADA</td> <td>■ FASALKA 3AAD</td> </tr> </table> | ■ XILIGA DHALASHA ILLAA 1 | ■ DUGSIGA BIRIMADA 3 | ■ FASALKA 1AAD | ■ 1-2 SANO | ■ DUGSIGA XANAANADA-K 4 | ■ FASALKA 2AAD | ■ 2-3 SANO | ■ DUGSIGA XANAANADA | ■ FASALKA 3AAD |
|---|---|--|---|--|--|---|--|--|---|---|
| ■ XILIGA DHALASHA ILLAA 1 | ■ DUGSIGA BIRIMADA 3 | ■ FASALKA 1AAD | | | | | | | | |
| ■ 1-2 SANO | ■ DUGSIGA XANAANADA-K 4 | ■ FASALKA 2AAD | | | | | | | | |
| ■ 2-3 SANO | ■ DUGSIGA XANAANADA | ■ FASALKA 3AAD | | | | | | | | |
| <p>Fasalka 3aad: 2IPO: Waxay facooda kala shaqeeyaan nashaadaadka kooxaha yaryar iyo kuwa kooxaha waawayn. Waxay fahmaan inay jiraan xirfado kaladuwan iyo awoodo kaladuwan oo ay ilmaha isku faca ah leeyihiin. 2SB: Waxay fahmaan qaab xushmada leh ee loola hadlo dadka kale waxayna xushmeeyaan goobta qofka. 4S: Waxay yaqaanaan jawaabaha ku habboon dhibaateynta, cagajuglaynta, xadgudubka iyo waxyeelooyinka. 6S: Waxay fahmaan sida dadku qayb oga yihiin bii'ada iyo sida ay gacan oga geysan karaan inay abuuraan bii'o caafimaad leh.</p> | <p>1b ■ W Waxay muujiyaan fahmida “sharciga wayn” ee la xariira fikirka iyo badqabka, naxariista, xushmada, iyo daryeelida shey'yada iyo agabyada yaala bii'ada.</p> <p>3a ■ W Si sax ah u dhammaystira is-qiiamaynta doorka shaqada kooxda.</p> | | | | | | | | | |
| <p>Fasalka 2aad: 2IPO/2PSCR: Waxay si habboon oga qaybqaataan ulana shaqeeyaan kooxaha. 2SB: Waxay muujiyaan tixgelin, xushmad, iyo isbarbardhiga dadka kale. 4NH: Waxay bilaabaan inay fahmaan cawaaqibka xumada dabeecadaha caafimaadka leh iyo xulashooyinka, sida siyaabaha looga hortago xanuunada. 6SS: Waxay bartaan sida bulshada maxaliga ah u shaqeeyaan, qaabab badan oo bulshadu isku abaabulaan.</p> | <p>3a ■ W Waxay dhammaystiraan mashaariicda iskaashiga carruurta kale.</p> | | | | | | | | | |



Gobalka Washington
Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)

GOLD®

| | | |
|---|---|--|
|  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD |
|  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD |
|  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD |

Fasalka 1aad:

2IPO: Waxay kordhiyaan wacyiga dabecadaha dadka dhexdooda ah iyo isgaarsiinta.

2IPO: Waxay si wada shaqeyn leh ula shaqeeyaan dadka kale.

4NH: Waxay bilaabaan sida go'aankooda gaarka ah u saameyn karo caafimaadka iyo badqabka hadda iyo kan mustaqbalka.

6S: Waxay bilaabaan inay abuuraan dookhyo madax banaan oo ku aadan caafimaadka bii'ada iyo bulshada, sida si habboon u tuurista qashinka, dib u warsheynta iyo/ama ka fakirada qaababka dib loogu isticmaali karo.

6SS: Waxay ka hadlaan qoysaska iyo qaababka qoysasku u nool yihiin ogana wada shaqeeyaan xaafada.

1b   

Waxay fahmaan oo sharxaan sababaha sharciyada.




3a   

Waxay la shaqeeyaan oo la wadaagaan fikradaha iyo agabka qaa bulshadu u aqbali karto.



Gobalka Washington
Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)

GOLD®

| | | |
|---|---|--|
|  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD |
|  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD |
|  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD |

Dugsiga Xanaanada:

1FC: Waxay carruurta yaryar ka caawiyaaan waxyaabahaaysan kaligood sameyn karin.

1SM: Waxay awoodaan inay sugaan--tookaysiga, daryeelida, iwm.

1SM: Waxay badelaan ficillada si ay ula kulmaan waxa looga filaayo meelo iyo xaalado kaladuwan, sida kabaha oo la iskaga siibo guriga, loogana tago iskuulka, iyo in la xirto kabaha roobka.

2SB: Waxay awoodaan inay ogolaadaan goobtaada gaarka ah (“Waxay ku fadhiyaan kursigayga”) iyo inay xushmeeyaan goobaha dadka kale.

2SB: Waxay gacan ka geystaan, la wadaagaan, tookeysii la sameeyaan lana shaqeeyaan kooxaha.

4NH: Waxay sameeyaan go'aano wanaagsan oo ku aadan dhaqamada caafimaadka.

4NH: Waxay gacan ka geystaan diyaarinta cuntooyinka iyo cunada fudud.

6S: Waxay bilaabaan inay fahmaan sida waxyaabaha ay dadku sameeyaan isbadelaan bii'ada. Waxay aqoonsadaan in ficillada u gaarka ah ay saamaynku leeyihiin deegaanka si ka wanaagsan (sida waraabinta dhirta) ama si kasii xun (sida ku tumashada dhirta).

6SS: Waxay bartaan fikradaha caddaaladda iyo ixtiraamka xuquuqda iyo fikradaha dadka kale.

6SS: Waxay yaqaanaan dadka sharciyada ka fuliya dugsiga iyo bulshada dhexdeeda sida (maamulaha, macallinka, ilaalada isgoysyada, wadaha basaska, dab damiska, iwm.).

3a   

Waxay la shaqeeyaan oo la wadaagaan fikradaha iyo agabka qaa bulshadu u aqbali karto.

1b  

Waxay adeegsadaan xeerarka aasaasiga ah iyo xaaladaha cusub ee la midka ah.

1c   

Waxay qaataan masuuliyada la xariirta caafimaadka.

3a   

Waxay ardayda kale la wadaagaan qalabka marka ay joogaan fasalka iyo banaanka.


1b    

Waxay maamulaan xeerarka fasalka, hab socodyada, iyo kala guurka ayagoo marmar sameynaaya xusuusino.



Gobalka Washington
Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)

GOLD®

| | | |
|---|---|--|
|  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD |
|  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD |
|  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD |

Dugsiga Birimada (4-5):

2SB: Waxay isticmaalaan caawimaada dadka waawayn si ay ula wadaagaan ayna sameeyaan tookadooda.

2SB: Waxay sugaan tookadooda ayagoon xanaaqin ama qabsan. Waxaa laga yabaa inay lumiyaan xiisaha shayga ama hawsha kahor intaan la gaarin tookadooda.

4DLS: Waxay si fudud u muraajaceeyaan una bartaan waxa la sameeyo marka la sameynaayo hawlaha caadiga ah (sida wakhtiga cuntada, wakhtiga sariirta).

4NH: Waxay gacan ka geystaan diyaarinta cunto fudud oo caafimaad leh waxayna cuntada u adeegtaan si iskood ah marka ay cunto rabaan.

4NH: Waxay yaqaanaan wax oo isticmaalo alaabaha isku daryeelida sida (shanlada iyo cadayga).

4S: Waxay raacaan xeerarka badbaadada ee gudaha iyo dibaddaba.

6S: Waxay dusha u ritaan masuuliyada noolaha, sida quudinta kalluunka, waraabinta dhirta, iwm.

6S: Waxay ka qaybgalaan (ayagoo tilmaamo qof wayn ka helaaya) dhaqdhaqaaqyada lagu ilaalinaayo deegaanka, sida qaab habboon qashin u qubida, kaydinta waraaqaha iyo gasacadaha dib loo warshadeeyo, iwm.

6SS: Waxay aqoonsadaan shaqooyinka qaar kamid ah bulshada (karaaniga dukaanka cuntada, darawalka baska, dakhtarka).

1c   

Waxay qaataan masuuliyada la xariirta caafimaadka.

3a   

Waxay ardayda kale la wadaagaan qalabka marka ay joogaan fasalka iyo banaanka.

1b    

Waxay maamulaan xeerarka fasalka, hab socodyada, iyo kala guurka ayagoo marmar sameynaaya xusuusino.

3a   

Waxay qaataan tookadooda.




1c    

Waxay muujiyaan kalsooni si loo daboolo baahiyaha gaarka ah.



Gobalka Washington
Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)

GOLD®

| | | |
|---|---|--|
|  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD |
|  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD |
|  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD |

Dugsiga Birimada (3-4):

1SC: Waxay yaqaanaan naftooda oo qayb ka ah qoyska, kooxda ruuxiga ah, dhaqanka, bulshada, iyo/ama koox kale oo qoysku ka tirsan yahay.

1SM: Waxay xasuustaan ayna gacan ka geystaan hawl maalmeedka caadiga ah, sida gelitaanka kursiga baabuurka, iyo badelka hal hawl oo kale, oo leh xusuusinta marmar ah.

2IPO: Waxay wax la wadaagaan caruurta kale waxayna qaataan tookeysigooda.

2SB: Waxay ka jawaabaan tilmaamaha dadka waaweyn ee ku saabsan iska fogeynta alaabta ama ka taxaddarka.

2SB: Waxay fiiriyaan boosaska shey'yada waxayna gacan ka geystaan in meel la dhigto (sida alaabta carruurta ku ciyaarto, waxayna ku ridaan weelka saxan dhaqidda).

2SB: Waxay baaraan, ku tababartaan fahanka doorarka bulshada iyada oo loo marayo ciyaar. Waxay la qabsadaan doorar iyo dareeno kaladuwan inta lagu jiro ciyaarta iska yeelyeelida.

2PSCR: Waxay sugaan tookadaan.

4DLS: Way labistaan waxayna gacan ka geystaan iska siibida labiska, waxay iska siibaan jaakadda ayagoo dhigaaya meesha loogu talagalay, waxay bilaabaan inay si iskood ah u sameeyaan baahiyaha musqusha, ayagoo gacmahana dhaqata oo tuwaal u isticmaalaya si ay isku qalajiyaan.

4NH: Waxay gacan ka geystaan diyaarinta iyo nadiifinta miiska cuntooyinka. Waxay soo qaataan alaabaha cuntada.

4S: Waxay bilaabaan inay bartaan xeerarka badbaadada ee dhaqdhaqaaqyada maalinlaha ahee ilmaha.

6SS: Waxay doorka qoyska ku ciyaaraan ciyaarta, waxayna aqoonsadan sida qof walba u dhaqmaayo una jilaayo qaybtooda waqtiga yar. Waxay ku raaxeystaan doorarka adag.

1b    



Waxay maamulaan xeerarka fasalka, hab socodyada, iyo kala guurka ayagoo marmar sameynaaya xusuusino.

3a   

Waxay qaataan tookadooda.

1c    

Waxay muujiyaan kalsooni si loo daboolo baahiyaha gaarka ah.



1b    

Waxay dadka waawayn ka aqbaan tilmaamaha.



Gobalka Washington
Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)

GOLD®

| | | |
|---|---|--|
|  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD |
|  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD |
|  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD |

Ilmaha Socod baradka ah (16–36 billood):

1FC: Waxay aoonsadaa doorarka qoyska dhexdiisa.

1FC/2SB: Waxay ka qaybgalaan hawlaha qoyska wayna xanaaqaan marka aan la raacin jadwalada qoyska ama marka la badelo.

1SM: Waxay xusuustaan oo raacaan jadwalka iyo xeerarka fudud mararka qaarkood.

2SB: Waxay bilaabaan inay si habboon ugu dhaqmaan xubin ahaan ama bulshooyin kala duwan, sida qoyska, fasalka, deriska, bulshada dhaqanka.

2SB: Waxay gacan ka geystaan shaqooyinka fudud ee qoyska ama fasalka bulshada.

2PSCR: Waxaa ku adkaata inay sugaan tookadooda. Waxay isticmaalaan caawimaada dadka waawayn si ay ula wadaagaan ayna sameeyaan tookadooda.

4DLS: Waxay doonayaan inay ayagu is daryeelaan. Way labistaan waxay iska siibaan si buuxda (marka laga reebo dharka ku dhegan), waxay dhaqdaan gacmaha wayna qalajiyaan, ayagoo caawimaad helaaya.

4NH: Waxay cuntada ku cunaan qaado, ayagoon helin caawimaad.

4S: Waxay aqoonsadaan xeerarka badbaadada, laakiin had iyo jeer ma raacaan.

6S: Waxay si habboon u wajahaan dhirta iyo xayawaanka, adiga oo aan ku guubaabin dadka waawayn. Waxay muujiyaan walaac haddii xayawaan dhaawacmo ama xanuunsado. Waxau faallo ka bixiyaan waxa ay tahay in la sameeyo si loo kobciyo wax (“Geedkaas wuxuu u baahan yahay biyo”).

6SS: Waxay gacan ka geystaan hab socodka guriga iyo fasalka waxayna wax ka ilaaliyaan nadaafadda.


6SS: Waxay fahmaan doorarka kaladuwan ee bulshada.

1c 

Waxay muujiyaan kalsooni si loo daboolo baahiyaha gaarka ah.

1b 

Waxay dadka waawayn ka aqbaan tilmaamaha.

1c 

Waxay rabaan inay naftooda wax u qabtaan.

3a 

Waxay si wanaagsan ugu jawaabaan dadka kale.




1b 

Waxay ka jawaabaan tilmaamaha daryeelaha ee ku saabsan sida loola dhaqmo dadka si habboon.



Gobalka Washington
Tilmaamaha Hormarka iyo Waxbarashada Dhallaanka (ELDGs)

GOLD®

| | | |
|---|---|--|
|  XILIGA DHALASHA ILLAA 1 |  DUGSIGA BIRIMADA 3 |  FASALKA 1AAD |
|  1-2 SANO |  DUGSIGA XANAANADA-K 4 |  FASALKA 2AAD |
|  2-3 SANO |  DUGSIGA XANAANADA |  FASALKA 3AAD |

Ilmaha yaryar (0–18 billood):

1SM/6SS: Waxay fahmaan ayna raacaan qawaaniinta iyo jadwalada qaarkood, iyo tilmaamaha fudud.

2SB: Waxay tookadooda ka qaataan ciyaaraha bulshada.

4DLS: Waxay caawimaad ka geystaan labiska, dhar bixista, xafaayada.

4DLS: Waxay dhaqdaan gacmaha wayna qalajiyaan, ayagoo caawimaad helaaya.

4NH: Waxay daryeel bixiyaha ka caawiyaan qabashada dhalada. Waxay soo qaataan koob waxayna cabaan waxa kujira. Waxay cuntada ku cunaan qaado.

6S: Waxay ka jawaabaan tilmaamaha daryeelahaee ku saabsan sida loola dhaqmo dadka si habboon.


6SS: Waxay yaqaan meesha qashinku yaalo ama weelka qashinka dib loo warshadeeyo.

1b  

Waxay dadka waawayn ka aqbaan tilmaamaha.

1c  

Waxay rabaan inay naftooda wax u qabtaan.

3a  

Waxay si wanaagsan ugu jawaabaan dadka kale.

1b  

Waxay ka jawaabaan tilmaamaha daryeelahaee ku saabsan sida loola dhaqmo dadka si habboon.

1c  

Waxay muujiyaan baahiyaha iyo rabitaanka; waxayna ka qayb qaataan hawsha marka qof wayn daboolayo baahiyaha.



**Xog Dheeraad ah A:
10 Ka Astaamood ee ugu sarreeya Dugsiga
Sare ee SEL**

10 Ka Astaamood ee ugu sarreeya Dugsiga Sare ee SEL

Ka maamul ahaan, waxaa muhiim ah in la kor loo qaado jawiga naxariista leh iyo taageerada bulsho iyo shucuureed. Waxaad ogaan doontaa in dugsigaagu ku socdo wadada saxda ah marka aad aragto waxyaabahaan:



Xafiiska Kormeeraha Guud ee Washington
WAXBARASHADA

1. Waxbarashada SEL

- Waxbarasho gaar ah oo ku saabsan waxbarashada bulshada iyo dareenka ayaa lagu bartaa dhammaan fasalada

2. Isdhexgalka SEL

- Waxbarashada SEL waxay hoos timaadaa waxbarashada maalinlaha ah

3. Codka Ardayga

- Codadka ardayga ayaa la qiimeeyaa waana la tixgeliyaa marka go'aan la gaaraayo

4. Cimiladu waxay gacan ka geysataa Kobaca SEL

- Fasal kasta iyo dugsiga guud ahaan wuxuu bixiyaa jawi wanaagsan oo taageero bixiya

5. Dadka waawayn ee SEL Taageerooyinka

- Macalimiinta, shaqaalaha taageerada bixiya, iyo qoysaska waxaa la siiyaa fursado ay ku kobciyaan xirfaddooda bulshadeed iyo shucuureed

6. Habdhaqanada Wanaagsan Taageerooyinka

- Dugsigu waxa uu xooga saaraa nidaamyada edbinta wanaagsan iyo caddaaladda dib u soo celinta

7. Iska isdhexgalka Taageerooyinka

- Dugsigu waxa uu bixiyaa taageerooyin isdaba joog ah oo daboolaya baahida ardayda dhammaatood

8. Qoyska Iskaashatada

- Dugsigu waxa uu kobciyaa xiriirka waxa uuna taageero siiyaa qoysaska

9. Bulshada Iskaashatada

- Dugsigu waxa uu raadiyaa siyaabo ay iskaashi ula yeeshaan bulshadooda si loo kobciyo jawiga taageerada leh

10. SINNAANTA

- Dugsigu waxa uu mudnaanta siinayaa sinnaanta dhammaan hab dhaqanka SEL wuxuuna qirayaa baahiyaha kala duwan ee bulshooyinka iyo qoysaska kala duwan

**Xog Dheeraad ah B:
Milicsiga SEL ee Gaarka ah**

Milicsiga SEL ee Gaarka ah

Ujeedada: Qalabkaan waxaa loogu talagalay dib isku milicsiga. Waa inaan loo adeegsan in lagu qiimeeyo waxqabadka. Maamulayaasha iskuulka, maamulayaasha, xubnaha kooxda SEL, xubnaha shaqaalaha, iyo dadka kale ee waawayn ayaa u adeegsan kara qiimeynta awooda shaqsiyeed, ka fikirida sidii loo qaabeeyn lahaa awoodahaas marka ay la falgalayaan dadka kale, ayna qorsheeyaan xeelado lagu hormarinaaayo kobaca dhinacyada la xariira aqoonta bulshada, haddii lagu isticmaalo goob kooxeed, shaqsiyaadku waa inay marka hore si gaar ah u dhameystiraan milicsiga, kadibna ka wada hadlaan mawduucyada guud iyo tusaalooyinka xooga iyo caqabadaha la hawlgalayaasha ama kooxo yaryar. Shakhsiyaadka ayaa ku soo laaban kara dib u milicsigaan sanadka oo dhan si ay dib ugu eegaan hadafyada shaqsiyaadka ayna u calaamadiyaan hormarka.

Halkaan waxaa ku qoran sida loo isticmaalo qalabka:

- Akhri bayaan kasta oo ka fikir xaalado gaar ah oo la xiriira, kadibna naftaada ku qiimee bayaankaan adigoo calaamadeeynaya bokiska ku khuseeya (aad bay u adag tahay way sahlan tahay, ama aad bay kuu fududahay inaad sameyso).
- Marka aad dhameysto, raadi qaababka xooga iyo caqabadaha. Macluumaadkaan adiga ayaa laguugu talagalay, markaa si sax ah uga jawaab adigoo ku xukumin jawaabaha sida "wanaagsan" ama "aad uma fiicna."
- Akhri jawaabahaaga kadibna fiicil ku samee waxyaabaha aad baratay. Dardargelinta qoraalka iyo tallaabooyinka lasoo jeediyay ayaa la heli karaa kadib bavaanada dib u milicsiga.

| | Is Baraarujinta | Aad u adag | Adag | Fudud | Aad u fudud |
|---------------------------------------|---|------------|------|-------|-------------|
| DAREEN LEH IS BARAARUJINTA | Waxaan Awoodaa inaan fahmo aana magacaabo shucuurtaada hadda. | | | | |
| | Waxaan u adeegsadaa dib u milicsiga si aan u fahmo qodobbada wax ku biiriya shucuurtaada iyo sida shucuurtaadu ii saameyso aniga. | | | | |
| | Waxaan fahansanahay in marka shucuurtaada, fikirkaaga, iyo eedaydu ay saamayn ku yeeshaan dabeecadayda iyo falcelintayda dadka iyo xaaladaha, labadaba si wanaagsa iyo si aan wanaagsaneynba. | | | | |
| AQOONSASHADA IYO OGGAANSHAHA | Waan waxaan aqaan waaqica ku saabsan awooddayda iyo xadidkayga. | | | | |
| | Waxaan fahmaa oo ka fikiraa qaababka ay aqoonsigayga u qaabeeyaan dadka kale iyo isirka, dhaqanka, waayo aragnimada, iyo bi'ada. | | | | |
| FIKIRKA IYO KORITAANKA MASKAXDA | Waxaan fahmaa oo ka fikiraa qaababka aqoonsigaygu u qaabeeyo aragtidayda, eexda, iyo cuqdadaha. | | | | |
| | Waxaan aaminsanahay inaan sii wadi doono barashada iyo kor u qaadista xirfadaha si aan si fiican u taageero dhammaan dhallinyarada si ay guul u gaaraan. | | | | |
| | Waxaan aaminsanahay inaan saameyn ku yeelan karo mustaqbalkayga aan kaari karo yoolalkayga. | | | | |
| | Waan arki karaa sida aan door qiimo leh ugu leeyahay shaqadayda, qoyskayga, iyo bulshadayda. | | | | |



| Is Maareynta | | Aad u adag | Adag | Fudud | Aad u fudud |
|--|---|------------|------|-------|-------------|
| MAAREYNTA DAREENADA | Waxaan helaa qaabab aan ku maareeyo shucuurta xoogan siyaabo aan si xun u saamayn kuwa kale. | | | | |
| | Waan ka gudbi karaa wax xataa marka aan dareemo jahwareer. Waan is dejin karaa marka aan dareemo walbahaar ama niyad jab. | | | | |
| DHIIRIGELINTA, SAMEYNTA FICIL, IYO DEJINTA YOOLKA | Waxaan hayaa filashooyin aad u sareeya oo igu dhiirrigeliya inaan gaaro yoolkayga oo aan dhiirrigeliyo koboca dadka aan hogaamiyo. | | | | |
| | Waxaan sameeyaa ficil iyo isbadel saamayn ku leh arrimaha aniga iyo bulshada waynba muhiimka u ah. Waxaan dejiyaa hadafyo la qiyaasi karo, caqabado leh, oo la gaari karo waxaana hayaa tillaabooyin cad oo aan ku gaari karo. | | | | |
| QORSHEYNTA IYO ABAABULIDA | Waxaan wax ka badelaa qorshayaasheyda markaan helo macluumaad cusub iyo xaqiiqooyin. Markaa ay jiraan mashquulka dalabyo badan, waxaan adeegsadaa xeelado si aan dib ugu helo diiradda iyo tamarta. | | | | |
| | Waxaan dhiitiraa shaqadayda waqtiga cusboonaysiinta shaqsiyeed. | | | | |

| Wacyigelinta Bulshada | | Aad u adag | Adag | Fudud | Aad u fudud |
|----------------------------------|--|------------|------|-------|-------------|
| NAXARIISTA IYO XIISAHA | Waxaan ka fahmi karaa aragtida qofka iyo dareenkiisa tilmaamaha hadalka iyo kuwa aan hadalka ahayn labadaba. Waxaan fiiro gaar ah u yeeshaa dareenka dadka kale waxaana aqoonsadaa sida erayadayda iyo dabeecadaydu u saameeyaan qofkaas. | | | | |
| | Waxaan u muujiyaa daryeel dadka kale marka aan arko inay si uun wax u gaareen. | | | | |
| FAHANKA FIKRADA | Waxaan ka shaqeeyaa inaan wax ka barto waaya aragnimada dadka jinsiyadaha, qowmiyadaha, ama dhaqamada kala duwan leh. | | | | |
| | Waxaan wax ka bartaa dadka leh aragtiyada kaladuwan ee aan hayga lamidka ahayn. Waxaan dadka kale waydiiyaa khibradooda iyo aragtidooda kahor intaan siin nuqulka dhacdooyinkayga. | | | | |
| FAHMIDA ARRIMAHA BULSHADA | Waan fahamsanahay xoogaga nidaamsan, taariikheed, iyo abaabul ee ka dhex shaqeeya dadka. | | | | |
| | Waan bogaadinayaa oo maamuusayaa kala duwanaanshaha dhaqameed ee ka dhex jira bulshada dugsigaga/goobta shaqada. Waxaan aqoonsanahay awoodaha dhalinyarada iyo qoysaskooda waxaana u arkaa inay yihiin shuraako wada jira. | | | | |



| Xirfadaha Xiriirka | | Aad u adag | Adag | Fudud | Aad u fudud |
|---|--|------------|------|-------|-------------|
| ISGAARSIINTA | Waxaan ahay qof diirada saara dadka kale marka aan dhegeysanaayo dadka kale oo si taxaddar leh ayaan oga fiirsadaa waxa ay sheegayaan. | | | | |
| | Waxaan si cad ugu qeexi karaa fikradaha aniga ii muhiim ah siyaabaha dadka kale uga qayb qaadan karo. | | | | |
| | Waxaan la yeelan karaa sheekooyin daacad ah oo ku saabsan isirka iyo cunsuriyadda dhalinyarada, qoysaskooda, iyo xubnaha kale ee bulshada. | | | | |
| DHISIDA XIRIIRADA IYO WADA SHAQEYNTA KOOXDA | Waxaan si macno leh ula xiriiraa dhalinyarada, qoysaskooda, asxaabtooda, iyo xubnaha bulshada ee ka soojeeda qowmiyad, dhaqanada, ama dhaqan-dhaqaalaha kala duwan ee ka duwan kuwayga. | | | | |
| | Waxaan bartaa dadka ii dhaw. | | | | |
| | Waxaan si wanaagsan ula shaqeeya dadka waxaana abuuraa jawi degan. | | | | |
| MAAREYNTA KHILAAFAADKA | Waxaan xaqiijiyaa in qof walba helo fursad uu kusoo bandhigaayo fikirkiisa. | | | | |
| | Markaan qof ka xumaado, waxaan kala hadlaa sida aan dareemaayo waxaana dhegeystaa aragtidooda. | | | | |
| | Waxaan si cad u qirayaa khaladaadka naftayda iyo kuwa dadka kaleba waxaana ka shaqeeyaa sidii aan wax u hagaajin lahaa. | | | | |
| | Waxaan ka shaqayn karaa raaxo daradayda marka aan la tacaalaayo isku dhacyada, waxaan dhegeysan karaa dareenka dhinacyada oo dhan, waxaana ka caawin karaa inay fahmaan aragtiyaha kala duwan. | | | | |

| Sameynta go'aan masuuliyad ku dheehan tahay | | Aad u adag | Adag | Fudud | Aad u fudud |
|---|---|------------|------|-------|-------------|
| QIIMEYNTA DHIBAATADA | Waxaan soo uruuriyaa macluumaadka muhiimka ah si aan u sahmiyo waxyaabaha sababa dhibaatooyinka aan arko. | | | | |
| | Waxaan aqoonsaday baahida loo qabo in si joogto ah loo hormaro, in la baaro xaaladda hadda jirta, iyo in la dhiirigeliyo fikirka cusub ee la xariira bulshada dugsiqayga. | | | | |
| | Waxaan ku lug yeelanayaa dadka kale oo ay saamayneyso* si qaab wadajir ah loo baaro dhibaataada kahor intaan la dooran xalka ama aan la bilaabin mashruuc cusub. | | | | |
| AQOONSASHADA XALALKA | Waxaan ku lug yeelanayaa dadka kale oo ay saamayneyso* si ay u abuuraa xalal badan oo aan u saadaaliyo natiijada xal kasta ee la xariira dhibaatooyinka waawayn. | | | | |
| | Waxaan helaa qaabab wax ku ool ah oo ixtiraam leh si aan uga gudbo dhibka, xitaa marka ay timaado qaadashada go'aano laga yaabo inaysan joogto ahayn. | | | | |
| | Waxaan tixgelinayaa sida xulashadayda loogu arki doono aragtiyada dhallinyarada aan u adeego iyo bulshada ku xeeran. | | | | |
| DIB U MILICSIGA SAAMEYNTA | Waxaan waqti u qaataa isfahanka & dib u milicsiga kooxda ee la xariira ujeedooyinka iyo hannaanka la adeegsaday. | | | | |
| | Waxaan tixgeliyaa sida go'aanadayda shaqsiyeed iyo kuwa xirfadeed ay u saameeyaan noloshada dadka kale. | | | | |
| | Waxaan ka caawiyaa inaan ka dhigo bulshadayda shaqsiyeed iyo xirfadeyda meel wanaagsan. | | | | |

*sida shaqaalaha iyo asxaabta, dhalinyarada, qoysaskooda, iyo xubnaha kale ee bulshada - gaar ahaan kuwa taariikh ahaan aan go'aanada la gaaro aan qaybta ka ahayn.



Akhri jawaabahaaga kadibna ficil ku samee waxyaabaha aad baratay.

1. Dib u milicso jawaabahaaga iyo aragtaada kasta oo aad ka qabtay geedi socodkaaga hormarka bulshada iyo shucuurta.
Haddii aad tixgeliso bayaankaas loo calaamadeeyay inay yihiin "kuwo fudud" ama "kuwo aad u fudud" waxay noqon kartaa aagag shaqsi ahaan xoog leh:
 - Sidee bay kartidaan u saameeyaan isdhexgalkaaga dhallinyarada iyo asaaga?
 - Waa maxay kartida xiriirka la leh awoodahaagu?
 - Midkee kamid ah kartidaada ayaa aaminsan tahay inuu kaa caawiyay gaarista yoolalka shaqsiyadeed iyo kuwa wada jirka ah.
 - Kee inta badan ku faraxsan tahay?**Haddii aad tixgeliso bayaankaas loo calaamadeeyay inay yihiin "kuwo adag" ama "kuwo aad u adag" waxay noqon kartaa aagag shaqsi ahaan aad u adag:**
 - Sidee kor u qaadista aagaan uga faa'iideysan kartaa is-dhexgalka aan la yeelanayno dhallinyarada iyo asxaabta?
 - Waa maxay caqabadaha xiriirka la leh awoodahaagu?
 - Dooro hal ama laba meelood oo aad rumeysan tahay inay kaa caawin doonaan inaad hormar ka gaarto yoolalka shaqsiyeed iyo kuwa wada jirka ah.
 - Samee xeeladaha aad naftaada ku xasuusiso inaad ku dhaqanto hab dhaqankaan cusub ama aad u soo qaado sidii wax aad kala shaqeyn lahayd lataliye ama tababare.**Markaad fiirinayso xaaskaaga, majireen waxyaabo kaa yaabiyay? Ma jireen waxyaabo xaqiijiyey waxaad horey u taqaanay?**
2. **Ka gudub baraarujinta una gudub ficil.**
Ama shaqsi ahaan, koox yar oo isku fac ah/asxaabtaada ah, ama bulsho dugsi oo buuxa, ka fikir/ka dood oo qor hababka aad ku dhaqaajin karto oo aad ku daydo kartida bulshada iyo shucuurta maalinta oo dhan.
 - Hawlaha shaqaalaha, iskuday qalabkaan CASEL ee kale: [Tusaaleynta SEL ee loogu talagalay ardayda](#) ama [Baratokoolada Kooxda Milicsiga ee SEL](#).Tixgeli waxa adiga iyo asxaabtaada/facaaga aad u baahan tihiin si aad u kortaan.
 - Waa kuwee aagaga ama odhaahyada sida joogtada ah loo sheego inay yihiin caqabad?
 - Waa maxay noocyada waayo aragnimada waxbarashada, taageerooyinka, ama isbadelada qaab dhismeedyada ama bii'ada caawin kara wax ka qabashada caqabadaha?
 - Qaaabab noocee ah ayaad adiga (iyo kooxdaada yar ama bulshada dugsi) ugu joogi kartaan dhiirrigelin iyo la xisaabtanka si aad u sii wadaan kobcinta iyo ka fiirsashada kartidaada bulsho iyo shucuureed?

**Xog Dheeraad ah C:
Isku Qiimeynta Fasalka
ee Taageerada SEL**

Isku Qiimeynta Fasalka ee Taageerada SEL

| | Waxa badankama aqaan dhaqankan si aan uga hirgeliyo fasalkayga | Dhaqankaan wali laguma soo bandhigin fasalkayga | Dhaqankaan waxaa uu inyar ka jiraa fasalkayga (liis garee tusaalayaasha) | Dhaqankaan wuxuu xoogaa ka jiraa fasalkayga (liis garee tusaalayaasha) | Dhaqankaan wuxuu si buuxda oga jiraa fasalkayga (liis garee tusaalayaasha) |
|--|---|--|---|---|---|
| Waxaan ku daraa fikradaha iyo aragtiyadacarruurta ee la xariira dejinta filashooyinka fasalka. | | | | | |
| Waxaan bixiyaa istaraatiijiyada ka caawiya carruurta inay la socdaan oo nidaamiyaan dhaqankooda iyo shucuurtooda. | | | | | |
| Waxaan si joogto ah u fulinayaa filashooyinka fasalka, laakiin waxaan tixgeliyaa baahida shaqsi ee ilmo kasta inta aan sidaas samaynaayo. | | | | | |
| Waxaan carruurta siiyaa qalab iyo xeelado ay ku aqbalaan cawaaqibka xumada dabeecadooda iyo xallinta dhibaatooyinka xaaladaha mustaqbalka. | | | | | |
| Waxaan qirayaa dabeecadaha wanaagsanee gaarka ah ee carruurta. | | | | | |

| | | | | | |
|---|--|--|--|--|--|
| <p>Waxaan carruurta ku dhiirigelinayaa inay dib u eegaan dabeecadahooda.</p> | | | | | |
| <p>Waxaan codsanayaa in ardaygu wax ku biiriyo, ayna bixiyaan xulashooyin macno leh oo ay abuuraan fursad carruurta ayna mas'uul ka noqdaan arrimaha fasalka dhexdiisa.</p> | | | | | |
| <p>Waxaan ka caawiyaa carruurta inay fahmaan isku xirka u dhexeeya xulashooyinka iyo natiijooyinka suurtagalka ah, waxaan tusaa inay jiraan siyaabo badan oo lagu xaliyo dhibaataada.</p> | | | | | |
| <p>Waxaan muujiyaa qadarinta aan u hayo ilmo kasta shaqsi ahaan waxaana u abuuraa fursado loogu talagalay dhammaan carruurta in lagu daro oo la mahadiyo.</p> | | | | | |
| <p>Waxaan ku dhiirigelinayaa carruurta inay tixgeliyaan aragtida iyo shucuurta ardayda ay isku fasalka yihiin.</p> | | | | | |
| <p>Waxaan ka caawiyaa carruurta inay ku celceliyaan dhegeysiga, ka jawaabida iyo wax ka barashada midba midka kale marka ay isla hadlayaan.</p> | | | | | |
| <p>Waxaan ka caawiyaa carruurta inay fahmaan sida looga dalbato aragtidooda iyo baahidooda dadka waawayn iyo ilmaha ay isku faca yihiin.</p> | | | | | |

| | | | | | |
|---|--|--|--|--|--|
| Waxaan ka caawiyaa carruurta inay gartaan oo nidaamiyaan dareenkooda marka ay wajahayaan caqabado cusub iyo caqabadaha la xariira guusha. | | | | | |
| Waxaan tusaale usoo qaataa xeelado kala duwan, xulasho iyo qalabyo loogu talagalay carruurta si ay u bartaan una xakameeyaan dareenada. | | | | | |
| Waxaan bixiyaa jawaab celin iyo dhiirigelin si aan uga caawiyo carruurta inay ka gudbaan caqabadaha iyo khaladaada. | | | | | |

La wadaag tusaalooyin kamid ah sida aad dhaqamadaan oga hirgeliso deegaankaaga:

Sidee baad u hubinaysaa in habdhaqankaagu yahay mid loo siman yahay oo ay u dhan yihiin dhammaan carruurta? Liis garee tusaalayaasha qaar.

Maxaad si fiican u sameyn kartaa si loo hubiyo sinaanta iyo wada jirka dhammaan carruurta?

La wadaag fikradahaaga ku saabsan barashada shucuurta bulshada (maxaad ka taqaan? Sidee u aragtaa muhiimada iyo goobaha waxbarashada?)

Tilmaamahaan midkee ayaad dareentaa inay yihiin awood aad leedahay waana maxay sababta?

Tilmaamahaan midkee la halgameysaa ama aad jeceshahay inaad ka shaqayso waana maxay sababta?

Erayada Luuqada

Adkeysiga: Sayniska hormarka aadanaha, adkaysiga waxaa badanaa lagu qeexaaa waddooyinka ama geedi socodyada u horseeda la qabsiga habboon ama hormarka ka muuqda duruufaha waaya aragnimada xun.

<https://www.child-encyclopedia.com/sites/default/files/textes-experts/en/834/resilience-in-development-the-importance-of-early-childhood.pdf>

Ciyaarta: Ciyaartu waa hawl muhiim u ah hormarinta is xakamaynta iyo sidoo kale kor u qaadista luuqada, garashada, iyo kartida bulshada. [Ciyaarta] waxay siisaa [carruurta] fursado ay ku hormariyaan kartida jirka iyo ku raaxeysiga bannaanka, fahmaan oo macno u yeeshaan adduunkooda, la falgalaan dadka kale, muujiyaan oo xakameeyaan shucuurta, kobciyaan awoodooda astaanta iyo xallinta dhibaatooyinka, iyo ku celcelinta xirfadaha soo baxaya.

<https://www.naeyc.org/resources/pubs/books/spotlight-young-children-exploring-play-a-conversation-about-play>

Dareenka buuxa: fiiro gaar ah u yeelashada arrin gaar ah: ujeedo ahaan, xilligan la joogo iyo si aan xukun lahayn.

<https://www.masterclass.com/classes/jon-kabat-zinn-teaches-mindfulness-and-meditation/chapters/a-guide-to-mindfulness#>

Halbeega: waa erey loo isticmaalo in lagu aqoonsado yoolalka dhisidda xirfadaha gaarka ah oo la qiyaasi karo ee lagu barto heerka waxbarashada shucuurta bulshada (SEL). Heerarka SEL, halbeegyada, iyo tilmaamayaasha ayaa qayb ka ah qaab dhismeedka Gobolka Washington ee SEL, kaas oo si cad

u qeexaya waxbarashada shucuurta bulshada iyo hormarka qaabab la taaban karo oo la fahmi karo loona taageeri karo si ula kac ah.

<https://www.k12.wa.us/sites/default/files/public/studentssupport/sel/pubdocs/Washington%20SEL%20Implementation%20Guide%20with%20CC.pdf>

Hawsha Fulinta: Xirfadaha hawl fulinta waa qaababka maskaxeed ee noo suurtageliya inaan qorsheyno, diirada saarno, xusuusano tilmaamaha, iyo inaan hawlo badan si guul leh u hagno.

<https://developingchild.harvard.edu/science/key-concepts/executive-function/>

Heerka: Heerarka waxbarashada ayaa sharaxaya xirfadaha, dabecadaha, iyo aqoonta carruurta da'doodu kala duwan tahay iyo heerarka hormarka.

<https://oregonearlylearning.com/parents-families/kindergarten-ready/early-learning-standards/#:~:text=Early%20Learning%20Standards&text=The%20outcomes%20or%20standards%20describe,Social%20and%20Emotional%20Development>

Karti: waxaa loola jeedaa aqoon balaaran, xirfado, iyo sifooyin kala duwan oo lagu dabaqi karo dhammaan tacliinta, shaqada, iyo goobaha bulshada, oo la rumeysan yahay inay lagama maarmaan u tahay guusha dunida maanta ee aanjoogno.

<https://www.k12.wa.us/sites/default/files/public/studentssupport/sel/pubdocs/Washington%20SEL%20Implementation%20Guide%20with%20CC.pdf>

Naqshada Caalamiga ah ee Waxbarashada (UDL): waa qaab dhismeedka lagu hago naqshadaynta bii'ada waxbarashada ee la heli karo oo ku adag dhammaan. Ugu dambeyntii, hadafka UDL waa in la caawiyo ardayda si ay u noqdaan “barayaal khabiiri ah,” kuwaas oo, mid walba si gaar ah, ujeedo iyo dhiirigelin u leeyahay, kheyraad iyo aqoon u leh, iyo istiraatiijiyad iyo yool ku saleysan hadaf. UDL waxay ujeedadeedu tahay inay badesho naqshadda deegaanka halkii ay badeli lahayd ardayga. Marka bii'ada si ulakac ah loogu talagalay inay yareeyaan caqabadaha, dhammaan ardaydu waxay ka qayb

qaadan karaan waxbarasho adag oo macno leh.

<https://udlguidelines.cast.org/more/frequently-asked-questions>

Nidaamka Waxbarashada: waa hab ama qaab lagu turjumo, isbarbardhig loogu sameeyo ama lagu dhex socdo heerarka xogta ama xirfadaha ama nuxurka laga badelo hal dhaqan oo loo badelo mid kale.

<https://sites.ed.gov/ous/2012/05/crosswalks/>

Rajo: Rajadu waxay keenaysaa geedi socod fikir garasho leh oo ay weheliso shucuur ah in wax wanaagsan ay dhici doonaan.

(Valle, Heubner, & Suldo, 2004, p. 320).

Ka mid Noqoshada: kamid noqoshada waxay ka kooban tahay qiyaamka, siyaasadaha, iyo dhaqamada taageera xaq ilmo kasta iyo ilmaha yar iyo {qoyskooda}, iyadoon loo eegin kartida, inay ka qaybgalaan waxqabadyo iyo xaalado kaladuwan xubnaha buuxa ee qoysaska, bulshooyinka, iyo bulshada. Natiijooyinka la rabo ee waayo aragnimada loo dhan yahay ee carruurta naafada ah iyo kuwa aan lahayn iyo qoysaskooda waxaa kamid ah dareen lahaansho iyo xubinnimo, xiriir bulsheed oo wanaagsan iyo saaxiibtinimo, iyo hormar iyo waxbarasho si ay u gaaraan awoodooda buuxda.

https://www.naeyc.org/sites/default/files/globally-shared/downloads/PDFs/resources/position-statements/ps_inclusion_dec_naeyc_ec.pdf

Soo celinta Cadaaladda-- badel wax ku ool ah oo loogu talagalay jawaabaha ciqaabta ah ee khaladka. Waxaa dhiirigeliyay dhaqamada dhaqanka, waxay isku keentaa dadka waxyeeladu soo gaartay dadka mas'uulka ka ah waxyeellada ayagoo helaaya bii'o ammaan ah, kor u qaadaysa wada hadalka, la xisaabtanka, iyo dareenka bulshada ee xoogan.

<https://www.edutopia.org/blog/restorative-justice-tips-for-schools-fania-davis>

Wax ku oolnimada: aaminaada qofka ee ah inuu guulaysan karo markay fulinayaan hawl gaar ah.

<https://dictionary.cambridge.org/us/dictionary/english/self-efficacy>

Dareenka Lahaanshaha: Lahaanshuhu waa dareenka amniga iyo taageerada marka ay jirto dareen aqbalaad, kamid noqoshada, iyo aqoonsi xubin ka tirsan koox gaar ah. Waa marka shaqsi uu deegaankiisa ku xiri karo uuna jeclaan karo bii'ada.

<https://diversity.cornell.edu/belonging/sense-belonging>

Tusaaleynta: Tusaaleynta waa hal hab oo dhaqanka lagu barto. Marka qofku u fiirsado dabeecadda qof kale kadibna uu ku daydo habdhaqankaas, waxay tusaaleynayaan dabeecadda. Tan waxaa mararka qaarkood loo yaqaanaa waxbarashada indho indhaynta ama waxbarashada bulshada. Tusaaleynta waa nooc kamid ah waxbarashada duuga ah oo aan loo baahnayn in toos wax loo baro.

<http://psychology.iresearchnet.com/social-psychology/control/modeling-of-behavior/#:~:text=Modeling%20is%20one%20way%20in,direct%20instruction%20need%20not%20occur>

Tusaha: cabirka koritaanka. Qaab dhismeedka SEL ee Washington, tilmaamayaasha ayaa ah kuwa ugu yar uguna saxsan ee lagu qiyaaso koboca xirfadaha dareenka bulshada.

<https://www.k12.wa.us/sites/default/files/public/student-support/sel/pubdocs/Washington%20SEL%20Implementation%20Guide%20with%20CC.pdf>

Wax ku oolnimada: kartida wax soo saarka natiijada loogu talagalay.

<https://dictionary.cambridge.org/us/dictionary/english/efficacy>

Waxbarashada Dhaqanka Ku Habboon: waxbarashada lagu aqoonsado muhiimka oo ay kujiraan dookhyada dhaqanka ardayda ee dhammaan aagga waxbarashada. Astaamaha dhaqanka waxbarashada ku habboon waxaa kamid ah aragtiyo togan oo ku aaddan waalidiinta iyo qoysaska; isgaarsiinta filashooyinka sare; waxbarashada macnaha guud ee dhaqanka; waxbarida udub dhexaadka u ah ardayga; waxbarid dhaqameed dhexdhexaadinta ah; dib

u habaynta manhajka; iyo macalin oo ah sida fududeeye.
(Ladson-Billings, G. (1994). *The dreamkeepers: successful teachers of African American children* (Macalimiinta guuleystay ee Carruurta Afrikaan Ameerikaanka ah). Daaabacaada Jossey-Bass)

Dhaqanka Ku Haboon Kobaca: hababka kor u qaada kabcinta iyo waxbarashadailmo kasta ee ugu wanaagsan ayadoo loo maraayo xoog-ku saleysan, hab ciyaar ku salaysan oo leh farxad, waxbarasho habboon. Macalimiintu waxay hirgeliyaan habdhaqan ku habboon koritaanka ayagoo aqoonsanaya hantida badan ee dhammaan carruurta yaryar u keenaan barnaamijka waxbarashada dhallaanka sida shaqsiyaadka gaarka ah iyo xubnaha qoysaska iyo bulshooyinka. Dhisida awoodaha ilmo kastaiyo ka taxadarida waxyeelada—arrimaha ilmo kasta sida jirka ilmaha, garashada, caafimaadka iyo fayaqabka dareenka—macalimiintu waxay naqshadeeyaan oo hirgeliyaan bii'ada waxbarashada si ay oga caawiyaan dhammaan carruurta inay gaaraan awoodooda buuxda dhammaan dhinacyada hormarka iyo dhammaan meelaha ay ka kooban yihiin. Dhaqanka ku habboon hormarka ayaa aqoonsada oo taageera qof walba inuu yahay xubin qiimo leh oo ka mid ah bulshada wax baratay. Natiijo ahaan, si ay u noqoto mid ku habboon koritaanka, dhaqamadu waa inay ahaadaan kuwo dhaqan ahaan, luuqad ahaan, iyo karti u leh ilmo kasta.

<https://www.naeyc.org/resources/position-statements/dap/definition>

Waxbarashada Shucuurta Bulshada: SEL waa habka ay dhammaan dhallinyarada iyo dadka waawayn u helaan oo ay adeegsadaan aqoonta, xirfadaha, iyo dabecadaha si loo hormariyo aqoonsiyada caafimaadka leh, loona maareeyo shucuurta oo loo gaaro himilooyin shaqsiyeed iyo mid guud, la dareemo oo loo muujiyo u damqashada dadka kale, loo sameeyo loona ilaaliyo xiriirrada taageera, iyo go'aamo mas'uul ah oo daryeel leh.

<https://casel.org/what-is-sel/>

Waxyaabaha Ilaalinta: Arrimaha ilaalintu waa xaalado ama sifooyin shakhsiyaadka, qoysaska, bulshooyinka, iyo bulshada wayn ee yareeya

khatarta oo kor u qaada hormarka caafimaadka leh iyo fayoobaanta carruurta, dhallinyarada, iyo qoysaska.

https://www.childwelfare.gov/pubPDFs/protective_factors.pdf

Waxyeelada La ogyahay (Daryeelka/Waxbarashada): nidaamka adeega ilmaha iyo qoyska ee waxyeelada la ogyahay waa mid ay dhammaan dhinacyada ku lugta leh ay gartaan kana jawaabaan saameynta walaaca naxdinta leh ee ku yeeshay dadka xiriirka la leh nidaamka oo ay ku jiraan carruurta, daryeelayaasha, iyo bixiyaasha adeega. Barnaamijyada iyo wakaaladaha kujira nidaamka noocan oo kale ah waxay sii geliyaan oo sii wadaan wacyigelinta ku aadan dhaawacyada, aqoonta, iyo xirfadaha dhaqammada ururkooda, dhaqamadooda, iyo siyaasaddooda. Waxay u dhaqmaan ayagoo kaashanaya dhammaan kuwa ku lugta leh ilmaha, ayagoo adeegsanaya sayniska ugu wanaagsan ee la heli karo, si kor loogu qaado badbaadada jirka iyo nafsadda, fududeynta soo kabashada ilmaha iyo qoyska, iyo taageerida awoodooda inay ku sameeyaan kobac. Noqoshada war bixintu waa inay noqotaa qayb muhiim u ah hadafka guud ee nidaamka waxbarashada. Dugsigu waxa uu aqoonsaday waxyeelada la ogyahay inay waxyeelaadaas saameeyo aqoonyahannada shaqaynaya, ardayda, qoysaska, bulshooyinka, iyo nidaamyada. Sidaas oowgeed, kaalmada ururka, iskaashiga, iyo dhisida kartida ayaa lagama maarmaan ah.

<https://www.nctsn.org/trauma-informed-care/creating-trauma-informed-systems>

Xeerka: eraygaan waxaa lagu qeexaa awooda qofkasi uu qaab wanaagsan ugu maareeyo khibradaha shucuurta.

<http://www.selfinjury.bctr.cornell.edu/perch/resources/what-is-emotion-regulationsinfo-brief.pdf>

Ogeysiiska Sharciga



Marka laga reebo meelaha lagu xusay, shaqadaan [Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarista Dadwaynaha](#) ayaa waxaa lagu ruqsad lagu bixiyay sida ku xusan [Xeerka Ka Qaybgalinta Hal Abuurka](#).

Ruqsadaha agabka kale oo leh heerar kaladuwan ee oggolaanshaha isticmaalaha ayaa si cad loogu tilmaamay agagaarka waxyaabaha gaarka ah ee ku jira agabka.

Ilahaan waxaa laga yaabaa inay ku jiraan lifaaqyada bogagga internetka ee ay maamulaan dhinacyada saddexaad. Lifaaqyadaan waxaa loo bixiyay si aad ugu habboonaan karto oo kaliya mana aha ama ma tilmaamayaan wax oggolaansho ah ama la socod ah OSPI.

Haddii shaqadaan la waafajiyo, ogoow isbadelada la taaban karo iyo dib u magcaabida, ka saarista xafiisyada Washington ee Kormeeraha Guud ee Tilmaamaha Tacliinta Dadwaynaha. Bixi sifooyinka soosocda:

“Ilahaan waxaa laga soo qaatay agabkii asalka ahaa ee uu bixiyay Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadwaynaha. Agabka originaalka ah ayaa laga heli karaa <https://www.k12.wa.us/student-success/resources-subject-area/social-emotional-learning-sel>.

Fadlan hubi in oggolaansho la helay si loo isticmaalo dhammaan walxaha daabacaadaan kujira sida (sawirrada, jaantusyada, qoraalka, iwm.) Ee aysan abuurin shaqaalaha OSPI, deeq bixiyeyaasha, ama qandaraasleyaasha. Oggolaanshahaan waa in loo muujiyaa sida bayaan sifeyn ah sida uu qeexay qofka leh xuquuqda daabacaada. Waa in la cadeeyaa in curiyuhu kamid yahay “marka laga reebo meel kale oo la xuso” marka laga reebo ruqsada furan ee OSPI.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo OSPI Xuquuqda daabacaada iyo Tusaha Ruqsada.

OSPI waxay si isku mid ah u siisaa dhammaan barnaamijyada iyo adeegyada ayadoo aan sameuyn takoor ku saleysan jinsiga, jinsiyada, caqiidada, diinta, midabka, asalka qaranka, da'da, halyeeynimada sharafta leh oo la sii daayay ama xaalad milatari, jihada galmada oo ay ku jirto muujinta jinsiga ama aqoonsiga, joogitaanka dareen kasta, maskax, ama naafonimo jireed, ama adeegsiga hagaha eyga tababaran ama xayawaanka u adeega qofka naafada ah. Haddii aad qabto su'aalo iyo cabashooyin takoorka la sheegay waa in lagu hagaajiyaa Agaasimaha Sinaanta iyo Xuquuqda Madaniga adoo laga wacaaayo 360-725-6162 ama Sanduuqa P.O. 47200 Olympia, WA 98504-7200.

Soo degso xogtaan ku qoran PDF ka oo laga heli karo <https://www.k12.wa.us/sites/default/files/public/OSPI-SEL-Pathways.pdf>. Agabkaan waxaa lagu qaabab kale marka la codsado. La xariir Xarunta Ilaha adoo kala xariiraaya 888-595-3276, TTY 360-664-3631. Fadlan tixraac lambarkan dukumiintiga si aad u hesho adeeg degdeg ah: - 21-0019.